# FAHAMKA DHISMAHA IYO WAXQABADKA GOLEYAASHA DEEGAANKA EE DOWLAD-GOBOLEEDYADA KOONFUR GALBEED, HIRSHABEELLE, IYO GALMUDUG

SOMALI PUBLIC AGENDA WARBIXIN CILMIBAARIS NO. 13




**FARXAAN ISXAAQ YUUSUF**

**JANAAYO 2024**

SOMALI
PUBLIC AGENDA

# Fahamka dhismaha iyo waxqabadka goleyaasha deegaanka ee dowlad-goboleedyada Koonfur Galbeed, Hirshabeelle, iyo Galmudug

Somali public agenda warbixin cilmibaaris no. 13

**Farxaan Isxaaq Yuusuf**

**Janaayo 2024**

Somali Public Agenda
Muqdisho
Soomaaliya
Tel: +252(0)85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
Website: <https://www.somalipublicagenda.org>

**© Somali Public Agenda 2024**

SSomali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

Marka laga reebo sawirada dhinac saddexaad uu qaaday, nuqulkan elektorooniga ah ee daabacaadan waxaa lagu heli karaa shatiga Creative Commons Attribution-NonCommercial-ShareAlike 3.0 (CC BY-NC-SA 3.0). Waxaad xor u tahay inaad nuqul ka daabacato, qeybiso oo gudbiso daabacaadda waase haddii aanay ganacsi ahayn, oo aad si habboon u sheegto daabacaadda, sidoo kalena aad ku faafiso shati lamid ah. Macluumaad intaas ka badan haddii aad rabtid, booqo shabakada Creative Commons: <http://creativecommons.org/licenses/by-nc-sa/3.0/>.

Somali Public Agenda
Muqdisho
Soomaaliya
Tel: +252(0)85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
Website: <https://www.somalipublicagenda.org>

Naqshadeynta: Somali Public Agenda
Tafatiraha: Peter Chonka

## Mahadnaq

Cilmibaaristan waxaa lagu sameeyay taageero ka timid National Endowment for Democracy (NED). Warbixinta waxaa tafatiray Peter Chonka, oo bare ka ah King's College London sidoo kalena Fellow ka ah Somali Public Agenda. SPA waxa ay sidoo kale u mahad naqeysaa Farxiya Maxamuud Xasan (cilmibaare ka tiran SPA), Ibraahim Jibriil (cilmibaare ka tirsan SPA), Bahja Axmed Maxamed (kaaliye cilmibaare ka tirsan SPA), Maxamed Cabdiraxmaan Aadam (Maareeyaha Madallada SPA ahna cilmibaare ka tirsan SPA) kaalinta mugga leh oo ay ka qaateen xog-uruurinta iyo qorista warbixintan.

## Ku saabsan Qoraaga

**Farxaan Isxaaq Yusuf** waa ku xigeenka agaasimaha fulinta iyo agaasimaha xarunta Waxbarashada iyo Horumarinta ee Somali Public Agenda. Sidoo kale waa bare sare oo dhiga culuumta siyaasadda. Farxaan waxa uu BA iyo MSc ee cilmiga siyaasadda ka qaatay Jaamacadda Muqdisho iyo Jaamacadda Omdurman ee Suudaan. Farxaan waxa uu khibrad 8 sano ka badan u leeyahay cilmibaarista iyo macallinimada. Mowduucyada ugu waaweyn ee cilmibaarista ee uu xiiseeyo waxaa kamid ah dhisidda dowladnimada colaadaha kadib, maamul wanaagga iyo qaran-dhisidda.

## Table of Contents


Erayo lasoo gaabiyay .......... ii

Nuxurka warbixinta .......... 1

1.0 Hordhac .......... 4

2.0 Habka daraasadda loo sameeyay .......... 6

3.0 Xaaladda dhismaha goleyaasha deegaanka ee Koonfur-galbeed, Hirshabeelle iyo Galmudug .......... 9

4.0 Jilayaasha Dhismaha Goleyaasha Deegaanka .......... 18

5.0 Carqaladaha geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ee Koonfur-galbeed, Hirshabeelle iyo Galmudug .......... 21

6.0 Metelaadda dhalinyarada, dumarka, iyo beelaha la heybsooco ee goleyaasha degmooyinka .......... 30

7.0 Caqabadaha hortaagan shaqeynta iyo waxqabadka goleyaasha deegaanka .......... 33

8.0 Caqabadaha heysta dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka waaweyn ee Hirshabeelle, Koonfur-galbeed & Galmudug .......... 41

9.0 Gunaanad .......... 45

10.0 Talooyin .......... 46

11.0 Tixraac .......... 50

## Erayo lasoo gaabiyay

| | |
|---|---|
| DFS | Dowladda federaalka Soomaaliya |
| DXDF | Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka |
| DHGD | Dhismaha Goleyaasha Deegaanka |
| GD | Golaha Deegaanka |
| KGS | Koonfur-Galbeed Soomaaliya |
| FCA | Finnish Church Aid |
| SSF | Somali Stability Fund |
| UNDP | United Nations Development Fund |
| USAID | United States Agency for International Development |
| SOYDEN | Somali Youth Development Network |
| UNOSOM | United Nations Operations in Somalia |

# Nuxurka warbixinta

Inkastoo Soomaaliya ay 2004-tii axdi federaal ah qaadatay, dadaallada lagu dhisayo maamullada federaalka ayaa billowday kadib markii dastuurka federaalka ee hadda jira si kumeelgaar ah loo ansixiyay Ogosto 2012. Afar dowlad-goboleed – Jubaland (2013), Koonfur Galbeed (2014), Galmudug (2015), iyo Hirshabeelle (2016) – ayaa la dhisay. Qodobka 48[1(b)] ee dastuurka federaalka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya ayaa awoodda maareynta dowladaha hoose siinaya heerka labaad ee dowladeed ee nidaamka federaalka; waxa uu qeexayaa in dowlad-goboleedyada ay dhisaan dowladaha hoose. Balse dhismaha dowladaha hoose ee dhammaan dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka, marka laga reebo Puntland, ayaa ahayd mid gaabis ah oo aan mudnaan la siin, iyadoo dowlad-goboleedyadu ay la tacaalayeen arrimo kale oo ka dhashay duruufihii lagu dhisay.

Daraasaddan waxa ay eegeysaa dhismaha goleyaasha deegaanka (DHGD) ee saddex dowlad-goboleed; Koonfur Galbeed, Hirshabeelle, iyo Galmudug. Gaar ahaan, waxay si qoto-dheer u iftiiminaysaa heerka uu hadda marayo Dhismaha Goleyaasha Deegaanka (DHGD) ee dowlad-goboleedyadan, caqabadaha uu wajahay geedi-socodka ee degmooyinkii laga dhisay goleyaal deegaan; caqabadaha haysta shaqeynta goleyaashii deegaan ee la sameeyay; in loo dhamaa iyo in aan loo dhameyn hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka; iyo caqabadaha hor-taagan billaabista dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka muhiimka ah ee la gaari karo ee ku yaalla saddexda Dowlad-goboleed. Ujeedada daraasadda ayaa ah in faham ballaaran laga siiyo siyaasiyiinta heer dowlad-goboleed iyo heer federaal iyo barnaajimyada la xiriira dowladaha hoose.

Daraasaddu waxay adeegsatay hab xog uruurin tayo ku saleysan, oo isugu jira wareysiyo lala yeeshay dad xog-ogaal ah iyo dood-kooxeedyo. Xogta daraasaddan waxaa lagasoo uruuriyay lix degmo – min labo degmo oo ka tirsan dowlad-goboleed kasta. Intii lagu guda jiray cilmibaarista, kooxdeena cilmibaarista waxay sameeyeen 45 wareysi waxa ayna qabteen 10 dood-kooxeed oo ay ka qeyb qaateen dad ka badan 100 qof oo lab iyo dheddig isugu jira.

Daraasaddu waxaa kasoo baxay natiijada soo socota oo lagu ogaaday xogtii lagasoo uruuriyay lixda degmo:

- Dowlad-goboleedka Koonfur-galbeed ayaa ahaa maamulkii ugu horeeyay ee dabayaaqadii 2017-kii billaabay dhismaha goleyaasha deegaanka waxa uuna ka dhisay gole deegaan degmada Xudur. Wixii markaas ka dambeeyay, Koonfur-galbeed waxay sii waday dhismaha goleyaasha deegaanka. Wadarta goleyaasha deegaanka uu dhisay maamulka Koonfur Galbeed intii u dhexeysay 2017 iyo 2023 waa 6.
- Galmudug ayaa sanadkii 2020-kii golihii deegaan ee ugu horreeyay ka dhistay magaalada Gaalkacyo (koonfurta), waxaana la joojiyay hannaankii kadib markii madaxweynaha dowlad-goboleedka uu ku mashquulay doorashadii xildhibaannada

federaalka. Howsha ayaa mar kale 2022-kii la billaabay, kadib labo sano oo hakad ah. Maamulka waxa uu sameeyay goleyaasha deegaanka ee lix degmo intii u dhexeysay bishii Luulyo 2022-kii iyo Juun 2023-kii. Hadda wuxuu leeyahay toddobo gole deegaan, taasoo ka dhigaysa Dowlad-goboleedka leh goleyaasha deegaan ee ugu badan.

- Hirshabeelle waxa ay leedahay labo gole deegaan, mid waa Warsheekh midna waa Jowhar, oo labaduba ka tirsan gobolka Shabeellaha Dhexe. Maamulku wuxuu goor hore dhismaha golaha deegaanka ka daahfuray Jowhar, Warsheekh, iyo degmooyin kale oo ugu waaweyn dowlad-goboleedka, balse hannaanka ayaa laga hirgeliyay Warsheekh oo kaliya oo golaha deegaanka loo sameeyay bishii Agoosto 2019-kii. Sikastaba ha ahaatee, shan sano oo ay Jowhar hakad ku jirtay, waxa ay ku biirtay degmada Warsheekh iyadoo noqotay degmadii labaad ee maamulka oo gole deegaan yeelatay dabayaaqadii Oktoobar 2023.

- Kuraasta golaha deegaanka ee degmooyinka A iyo B ee labada dowlad-goboleed ee Koonfur-galbeed iyo Hirshabeelle waxay waafaqsan yihiin sharciga dowladaha hoose ee dowlad-goboleedyada iyo Hannaanka Wadajir ee Maamulka Dowladaha Hoose. Sidaas darteed, degmooyinka leh darajada A – sida magaalo madaxyada iyo caasimadaha dowlad-goboleedyada – waxay leeyihiin 27 xubnood oo gole deegaan ah, halka degmooyinka darajada B ay leeyihiin 21 xubnood. Taas cagsigeeda, dowlad-goboleedka Galmudug ayaa khlaafay xeerkan. Shan kamid ah toddobada degmo ee Galmudug ayaa leh xubno gole deegaan oo ka badan kuraasta loo qoondeeyay degmo kasta. Labo degmo oo kaliya ayaa leh tirada kuraasta golaha deegaanka si waafaqsan heerka dowladaha hoose.

- Inta badan hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee dowlad-goboleedka Koonfur-galbeed iyo degmooyin kooban oo katirsan Galmudug ayaa la kulmay gacan-ka-hadal ay sameeyeen beelo/jufooyinka aan ku qanacsanayn awood-qeybsiga deegaannadooda. Iska horimaadyadan ayaa la sheegay in ay ka dhasheen dhimasho iyo dhaawac.

- Hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka waxaa faragelinayay hoggaanka Dowlad-goboleedyada si ay u hubiyaan in duga degmada uu noqdo qofa ay wataan. Taas awgeed, jilayaal kale oo muhiim ah ayaa laga saaray hannaanka, marka laga reebo odayaashii beelaha oo loo arkayay in ay la safan yihiin madaxda Dowlad-goboleedyada. Sikastaba ha ahaatee, kadib markii ay kasoo horjeesteen hoggaanka dowlad-goboleedka, meelaha qaarkood waa laga saaray.

- Dowlad-goboleedyada waxay ku tiirsanaayeen lacagta deeq bixiyayaasha si ay u dhisaan goleyaasha degmooyinka. Sikastaba ha ahaatee, Galmudug oo kaliya ayaa ku guuleysatay in ay dhisto 5 ka mid ah 7-da gole degmo ee la sameeyay iyadoo aan wax lacag ah loogu deeqin.

- Habka dhismaha goleyaasha deegaanka ee dhammaan dowlad-goboleedyada wuxuu ahaa mid degdeg ah oo qeybo muhiim u ah geedi-socodka ayaa laga booday iyadoo laga billaabay heerka awood-qeybsiga. Tani waxay dhalisay muran badan oo

ka dhashay geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka.

- Metelaadda dumarka aad ayay ugu yar yihiin goleyaasha deegaanka. Sikastaba ha ahaatee, goleyaasha deegaanka Koonfur-galbeed waxay leeyihiin metelaadda ugu sarreeya ee dumarka ee dhammaan saddexda dowlad-goboleed. Degmada Xeraale ee dowlad-goboleedka Galmudug hal haween ah keliya ayaa ku jirta 21-ka xubnood ee golaha deegaanka.

- Dhammaan dowladaha hoose ee dowlad-goboleedyada waxay la kulmaan caqabado waaweyn kuwaasoo wiiqaya shaqadooda iyo sii jiritaankooda. Waxaa caqabadahaas kamid ah amni-darrada; dakhli-uruurin la'aanta, aqoonta iyo karaanka xubnaha golaha deegaanka oo liidata, iyo maamul-daadejinta hooseysa; aragtida (khaldan) ee bulshada ee doorkooda; iyo khilaaf u dhexeeya xubnaha golaha iyo duqa degmada.

Daraasaddu waxay soo jeedineysaa talooyin tixgelin mudan si wax looga qabto arrimaha kasoo baxay daraasadda. Talooyinkaas waxaa kamid ah:

- Waa in dowlad-goboleedyada ay damaanad qaadaan qoondada haweenka ee 30% ah iyo in golaha deegaanka uu ka shaqeeyo in metelaad cadaalad ah ay dumarka helaan. Helidda haween karti badan oo goleyaasha deegaanka ka tirsan waxay waxtar badan u yeelan doontaa dowladaha hoose si ay u xoojiyaan taageerada muwaadiniinta maxalliga ah ee maamulkooda hoose.

- Waa in dowlad-goboleedyadu daadejiyaan awoodda dowladaha hoose oo ay ka caawiyaan inay uruuriyaan dakhligooda gudaha. Taas waxa dheer, waa in dowlad-goboleedyada ay u qoondeeyaan qayb ka mid ah dakhliga dowladda iyo lacagaha kale ee ka yimaada dowladda federaalka ayna u wareejiso dowladahooda hoose.

- Waa in Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada oo kaashanaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowladda federaalka ay billaabaan dadaallo dib-u-heshiisiin bulsho oo dhab ah, dhex-dhexaad ah, loo wada dhan yahay, taasoo la isugu keenayo beelaha colaadaha dhexyaallaan, lana siiyo fursad ay si furan uga hadlaan tabashooyinkooda, xalna ka gaaraan. Xal-u-hellida colaadaha xooggan ee jira waxay faa'iido u yeelan doontaa dhammaan daneeyayaasha, oo ay ka mid yihiin beelaha, dowlad-goboleedyada, iyo dowladaha hoose.

- Si loo helo dowlado hoose oo shaqeeya, waa in hoggaanka dowlad-goboleedyadu ka fogaadaan faragelinta nidaamka dhismaha goleyaasha deegaanka si ay usoo baxdo natiijooyinka ay rabaan iyo maayarro la sii ogyahay.

## 1.0 Hordhac

Kadib markii dastuurka kumeelgaarka ah la ansixiyay bishii Ogosto 2012-kii, dowladdii ugu horreysay ee Soomaaliya oo aan kumeelgaar ahayn ee uu hoggaanka u ahaa madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud (2012-2016) ayaa mudnaanta siisay federaaleynta Soomaaliya sida uu qabo dastuurka kumeelgaarka ah. Sida ku cad qodobka 48-aad, dowladda Soomaaliya ayaa ka kooban labo heer oo kala ah: Heer Dowlad Federaal iyo Heer Dowlad Goboleed. Inkastoo uu geeddi-socodku ahaa mid dhib badan, oo sababayay khilaaf u dhexeeya daneeyeyaasha, waxa uu 2013-kii ku bilowday dhismihii Dowlad-Goboleedka Jubaland; waxaa xigay Koonfur Galbeed (2014); Galmudug (2015), waxaana dabayaaqadii 2016-kii lagusoo gabagabeeyey dhismihii Dowlad Goboleedka Hirshabeelle.

Dowladda Federaalka Soomaaliya dastuurka uma idman in ay dhisto goleyaasha degmooyinka maadaama qodobka [48(1b)] ee dastuurka federaalka kumeelgaarka ah uusan dowladaha hoose u qaabeyn in ay noqdaan maamullo gaar ah waxaana la hoos geeyay dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka. Qodobkan ayaa sidaas awgeed awoodda maamulka dowladaha hoose siiyay dowlad-goboleedyada.

Dowladda federaalka ayaa kahor inta aan la dhisin dowlad goboleedyada waxa ay bishii July 2013-kii soo saartay sharciga maamulka degmooyinka iyo gobollada (FGS interior & Galmudug Interior Ministries, 2019). Sikastaba ha ahaatee, sharcigan ayaanan muhiimad yeelan tan iyo markii la dhisay dowlad-goboleedyada iyo sharciyadii xigay ee dowladaha hoose. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Dowladda Federaalka ayaa sidoo kale 2016-kii hormuud ka ahayd geedi-socodka diyaarinta Qaab-dhismeedka Qaran ee Wadajir ee Dowladaha Hoose (FGS interior & Galmudug Interior Ministries, 2019).

Dowladda federaalka ayaa diyaarisay qaab-dhismeedka Wadajir iyadoo la-tashiyo lala sameeyay dowlad goboleedyadii dhisnaa iyo bulshada rayidka ah. Qaab-dhismeedka ayaa udub-dhexaad u ah dadaallada dib loogu dhisayo goleyaasha degmooyinka. Waxa uu qeexayaa nidaam ay bulshadu hoggaamineyso oo degmooyinka loogu sameynayo maamullo metela waxa uuna ka kooban yahay afar qeybood: bogsiinta bulshada, kordhinta nabadda, wada-hadallada bulshada, iyo maamulka degmooyinka (United Nations Security Council, 2019). Intaa waxaa dheer, Qaab-dhismeedka Wadajir waxa uu dejinayaa nidaamka lagu dhisayo goleyaal dowladaha hoose ah iyo maamullo si joogto ah u shaqeeya, si loo hubiyo joogteynta howlaha nabad-dhisidda iyo dowlad-dhisidda (FCA, 2021). Sidaas si la mid ah, dowlad-goboleedyadu waxay meelmariyeen sharciga dowladaha hoose oo iyaga u gaar ah (Somali Stability Fund, 2020). Puntland ayaa sharcigaan sameysay 2003-dii, waxa ayna wax-ka-beddel ku sameysay 2020-kii.

Sameynta goleyaal deegaan oo shaqeeya oo ay bulshadu leedahay oo mas'uul ka ah bixinta adeegyada muhiimka ah (tusaale, caafimaadka iyo waxbarashada aasaasiga ah) ayaa kor u

qaadi kara sharciyadda dowladaha hoose waxa ayna xoojin kartaa xiriirka ka dhexeeya dadka deegaanka iyo wakiiladooda maxalliga ah (FCA, 2021). Sidoo kale, waa in goleyaasha deegaanku ay dejiyaan siyaasado hubinaya waxqabadka dowladaha hoose, ayna u qoondeeyaan dhaqaale lagu fuliyo howlaha dowladaha hoose (FCA, 2021).

Dowlad-goboleedyada isku heer kama taagna dhismaha goleyaasha deegaanka, maadaama qaar ay meel fiican marayaan, halka kuwa kalena ay dib u dhacsan yihiin. Marka taas la eego, Puntland iyo Soomaaliland ayaa degmo kasta oo ka tirsan dhulka ay maamulaan ka sameeyay goleyaal deegaan (Somali Stability Fund, 2020). Tusaale ahaan, Puntland waxay goleyaal degmo 2005-tii ka dhistay afarta degmo ee waaweyn ee kala ah: Boosaaso, Qardho, Garoowe, iyo Galkacyo (waqooyi) iyadoo taageero maaliyadeed ka heshay United Nations Development Programme (UNDP) (Reliefweb, 2008). Intaa waxaa dheer, Puntland ayaa sameysay goleyaasha deegaanka ee toddobo degmo kale 2006-dii, balse markan waxay heshay dhaqaale gudaha ah (Reliefweb, 2008). Hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ayaa si xawli ah ku billowday markii Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni uu Janaayo 8, 2019 la wareegay talada dowlad-goboleedka Puntland (Bareedo Platform, 2019).

Daraasaddan waxay taxliilineysaa dhismaha goleyaasha deegaanka ee saddex dowlad-goboleed ee kala ah Koonfur-galbeed, Hirshabeelle, iyo Galmudug. Daraasaddu waxay isku dayeysaa inay baarto caqabadaha nidaamka dhismaha goleyaasha deegaanka ee Dowlad-goboleedyadan; caqabadaha hortaagan sameynta goleyaasha degmooyinka ee magaalooyinka waaweyn ee saddexdan Dowlad-goboleed; iyo caqabadaha hortaagan shaqeynta goleyaasha deegaanka la dhisay. Daraasadan waxaa loo sameeyay in lagu wargeliyo dowladda federaalka, dowlad-goboleedyada iyo deeq bixiyayaasha si ay barnaamijyo iyo qorsheyn wanaagsan ugu diyaariyaan dhismaha/dib-u-doorashada goleyaasha deegaanka.

## 2.0 Habka daraasadda loo sameeyay

Daraasaddani waxaa lagu sameeyay habka tayaysan oo ku habboon nooca daraasaddan. Daraasaddu waxay sameysay wareysiyo dad xog-ogaal ah iyo dood-kooxeedyo. Daraasaddu waxay goobaha daraasadda laga sameynayo u xulatay saddex dowlad-goboleed kuwaasoo kala ah Galmudug, Hirshabeelle, iyo Koonfur-galbeed. Waxaa dowlad-goboleedyadaas laga sii doortay min labo degmo. Wadarta degmooyinka daraasadda laga sameeyay waa lix – Cadaado iyo Gaalkacyo oo Galmudug ah; Jowhar iyo Beledweyne oo Hirshabeelle ah; Baydhabo iyo Baraawe oo ka tirsan Koonfur-galbeed. Qaar kamid ah degmooyinkaas ayaa lahaa goleyaal degmo (Cadaado, Galkacyo, iyo Baraawe); qaarna ma lahayn (Beledweyne, Jowhar, Baydhabo). Sikastaba ha ahaatee, gole deegaan ayaa waxaa degmada Jowhar loo sameeyay dabayaaqadii Oktoobar 2023, labo bilood kadib markii aan xog uruurinta ka sameynay magaaladaas.

Waxaan qorsheynay inaan ka qabanno labo dood-kooxeedyo degmo kasta oo ay ka qeyb galayaan 10 qof oo isugu jira dhalinyarada iyo haweenka, iyadoo wadar ahaan 120 qof la qorsheeyay in ay ka qeyb galaan dood-kooxeedyada. Waxaa barbar socday qorsheynta 10 wareysi xog-ogaaleed oo laga sameynayo lixda degmo oo guud ahaan noqoneysa 60 wareysi xog-ogaaleed. Ka qeybgalayaasha wareysi xog-ogaaleedyada waxaa kamid ahaa wakiillo ka tirsan Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada kala duwan; dhalinyo, haween, bulshada rayidka ah, oday dhaqameedyo, ganacsato, xildhibaanno dowlad-goboleed, xubnaha goleyaasha deegaanka goobaha ay goleyaasha deegaanka ka dhisan yihiin, culimo iyo khubaro arrimaha maamulka degmooyinka ah.

Daraasaddu waxay ku bilowday dood-kooxeedyo hordhac ah oo loo qabtay khubaro arrimaha dowladaha hoose ah si loo fahmo arrimaha muhiimka ah ee dhismaha goleyaasha deegaanka ee dowlad-goboleedyada iyo in la qaabeeyo su'aalaha daraasadda. Dhowr maalmood kadib, waxa aynu qaabaynay su'aalo loo naqshadeeyay noocyada kala duwan ee dadka la wareysanayo. Sidoo kale, waxaan lix su'aal u diyaarinnay ka qaybgalayaasha dood-kooxeedyada.

Si loo fududeeyo xog uruurinta goob kasta, Somali Public Agenda (SPA) ayaa shaqaaleysiisey xubin katirsan bulshada rayidka oo leh sumcadda iyo xiriirka lagama maarmaanka ah ee degmo kasta si ay u diyaaryaan dadkii lala kulmi lahaa kahor inta aysan cilmibaarayaasha degmada u safrin. Kadib, hormuudka cilmibaarista, cilmibaarayaasha, iyo kaaliyeyaasha cilmibaarista ee Somali Public Agenda ayaa u safray degmooyinka bishii Luulyo 2023-kii. Shaxda soo socota waxay muujineysaa dood-kooxeedyada rasmiga ah iyo wareysi xog-ogaaleedyada la sameeyay, iyo goobaha laga sameeyay.

| Dowlad-goboleedka | Degmada | Dood-kooxeedyada | Ka qeybgaleyaasha dood-kooxeedyada | Wareysi xog-ogaaleedyada | Wadarta ka qeybgaleyaasha dood-kooxeedyada + wareysi xog-ogaaleedyada |
|---|---|---|---|---|---|
| Hirshabeelle | Jowhar | 2 | 20 | 7 | 27 |
| | Beledweyne | 2 | 20 | 10 | 30 |
| Galmudug | Gaalkacyo | 2 | 20 | 7 | 27 |
| | Cadaado | 2 | 20 | 6 | 26 |
| | Dhuusamareeb | 0 | 0 | 3 | 3 |
| Koonfur-galbeed | Baydhabo | 2 | 20 | 6 | 26 |
| | Baraawe | 0 | 0 | 6 | 6 |
| Wadarta ka qeybgaleyaasha daraasadda | | | | | 144 |

*Tusmada 1-aad: wuxuu muujinayaa tirada dood-wadareedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada laga sameeyay goobta daraasada.*

Sida shaxda kore ku cad, tirada dood-kooxeedyada si rasmi ah loo sameeyay ayaa hoos uga dhacday 120-kii dood-kooxeed ee la qorsheeyay ee lixda degmo, kuwaasoo ahaa 2 doo-kooxeed iyo 10 kaqeybgale ah degmo kasta. Sababta ayaa ah inaan u safri weynay degmada Baraawe – oo ah goob xog uruurinta labaad ee dowlad goboleedka Koonfur-galbeed – taas oo ay sabab u ahayd roobabkii dabeylaha watay ee El Nino oo saameyn ku yeeshay garoonka diyaaradaha ee degmada, kana dhigay mid aan shaqeyn muddadii lagu guda jiraha qorshaha safarka, kaasoo ahaa labadii toddobaad ee ugu dambeeyay ee bishii Nofeembar. Lix wareysi oo aan WhatsApp ku sameynay ayaan la yeelannay qaar ka mid ah dadka xog-ogaalka ah ee ku sugan Baraawe, innaga oo u marnay qof deegaanka yaqaanna oo inoo agaasimay wareysiyada.

Sidoo kale, wareysi xog-ogaaleedyada rasmiga ah, oo ah 38, ayaa sidoo kale ka yar tirada loo qorsheeyay lixda goobood ee daraasadda. Tani ayaa sabab u ahayd in qaar kamid ah dadkii aan helnay ee aan wareysan rabnay ay wareysiga ka oggolaadeen qofkii qorsheynayay balse markii dambe la haleeli waayay. Kuwo kale ayaa iyaguna lahaa jadwal mashquul badan muddadii lagu guda jiray safarrada goobaha kala duwan. Xog-uruuriyayaashu ma aysan sii joogi kareyn in kabadan shanta maalmood ee qorshahooda ahayd si ay kusoo gabagabeeyaan xog uruurinta degmo kasta.

Dhuusamareeb ayaa ka muuqata shaxdan, oo aan markii hore kamid ahayn goobihii xog uruurinta ee horay loo qorsheeyay. Hoggaanka cilmibaarista iyo kaaliyeyaasha cilmibaarista ayaa intii ay ku guda jireen howlihii shaqo ee Galmudug go'aansaday, inay booqdaan Dhuuso-mareeb si ay u wareystaan wakiillo ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta, iyo Dowladaha Hoose ee Galmudug oo hormuud ka ah geeddi-socodka dhismaha

goleyaasha deegaanka. Waxaan sidoo kale Dhuusomareeb ka helnay fursad aan kula xiriirno shaqsiyaad kale oo si dhow ula socday hannaanka.

Intii lagu jiray mudada xog-uruurinta, cilmibaarayaasha ayaa cod ka duubay dhammaan dood-kooxeedyada iyo inta badan wareysiyada, kadib markii ka qeybgalayaashu oggolaadeen (waxay ka qaateen qoraallo markii ay ka qeybgalayaasha wareysiyada aysan oggolaan duubista). Waxaan cod duubista u sameynay si aan si buuxda uga helno fikradaha iyo aragtida ka qeybgalayaasha innaga oo si faafahsan u qornay marxaladda qoraalka wareysiyada. Kadib markii lasoo gabagabeeyay xog uruurinta laga sameynayey degmo kasta, cilmibaarayaashu waxay qoraal u beddeleen codadkii ay soo duubeen iyagoo ku kaydiyey qalab xog aruurineed sugan oo internet ku xiran. Xogtii lasoo uruuriyay ayaa gorfeyn lagu sameeyay.

# 3.0 Xaaladda dhismaha goleyaasha deegaanka ee Koonfur-galbeed, Hirshabeelle iyo Galmudug

Qeybtaan waxa ay si qoto-dheer uga hadleysaa goleyaasha deegaanka laga sameeyay dowlad-goboleedyada Koonfur-galbeed, Hirshabeelle iyo Galmudug. Waxaa si faahfaahsan looga hadlayaa xaaladda goleyaasha deegaanka ee Dowlad-goboleed kasta, islamarkaana waxaa isbarbardhig lagu sameynayaa farqiga u dhexeeya goleyaasha deegaanka ee ilaa hadda laga dhisay Dowlad-goboleedyadan.

## 3.1 Koonfur-galbeed

Dowlad-goboleedka Koonfur-galbeed waxaa la aasaasay 7-dii Nofeembar 2014-kii; waa dowlad-goboleedkii labaad ee la sameeyo kadib Jubaland (2013). Waxa ay ku soo baxday hannaan ay ka jirtay kala qeybsanaan iyo khilaaf u dhexeeya dhinacyadii ay khusaysay, dhibaatooyinkii ka dhashay geeddi-socodkaasna waxa ay dhibaato ku hayaan dowlad-goboleedka waxa ayna saameyn ku yeesheen dhismaha goleyaasha deegaanka.

Dowlad-goboleedka waxa uu ka kooban yahay saddex gobol; Bay, Bakool, iyo Shabeellada Hoose; iyo siddeed iyo toban degmo. Gobollada Bay iyo Bakool ayaa leh min shan degmo, halka Shabeellada Hoose ay ka kooban tahay siddeed degmo. Degmada Baraawe ee gobolka Shabeellada Hoose katirsan ayaa loo asteeyay in ay noqoto xarunta maamulka Koonfur-galbeed, balse dowlad-goboleedka ayaa ku shaqeeya magaalada Baydhabo ee xarunta gobolka Bay – oo ah caasimad kumeelgaar ah, inkastoo degmada Baraawe aysan al-Shabaab heysan.

Afar kamid ah siddeed iyo tobanka degmo ee Koonfur-galbeed waxaa ka taliya al-Shabaab. Degmooyinkan waxa ay kala yihiin Rab Dhuurre iyo Tiyeeglow oo ka tirsan Gobolka Bakool, iyo Sablaale iyo Kuntuwaarey oo ka tirsan Gobolka Shabeellada Hoose.

Dhismaha golaha deegaanka ee Koonfur-galbeed ayaa la billaabay 2017-kii, xiligaasoo uu xilka hayay madaxweynihii hore ee maamulkaas Shariif Xasan Sheekh Aadan. Sida ay muujinayaan xogaha aan ka helnay dadkii aan ku wareysannay magaalada Baydhabo, qaar kamid ah degmooyinka saddexda gobol ee uu ka kooban yahay maamulka Koonfur-galbeed – Bay, Bakool & Shabeellada Hoose – ayaa laga dhisay goleyaal deegaan xilliyo kala duwan oo hore, inkastoo ay muddo kooban magac ahaan u jireen.[1]

Baydhabo iyo degmooyinka kale ee gobollada Bay iyo Bakool, tusaale ahaan, waxay lahaayeen goleyaal degmo sanadkii 1993 xilligii hawlgalka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya ee UNOSOM, taasina waxay sal adag oo awood qeybsi u dejisay isku dayadii xigay ee maamul u sameynta.[2] Kadib sanado badan oo Baydhabo iyo degmooyin kale aysan lahayn goleyaal deegaan, goleyaal degmo ayaa mar kale loo sameeyay degmooyinka Bay iyo Bakool xilligii

1 Wareysi lala yeeshay xubin ka tirsan bulshada rayidka Baydhabo, 25 Oktoobar 2023.

2 Ibid.

dowladdii kumeelgaarka ahayd ee uu hoggaaminayay marxuum Col. Cabdullaahi Yuusuf Axmed ee uu fadhigeedu ahaa Baydhabo sanadkii 2006.[3] Goleyaashan degmo ayaa jiray ilaa tan iyo markii ay al-Shabaab dowladdii kumeelgaarka ahayd kala wareegeen degmada Baydhabo sanadkii 2009, iyadoo howshan dib loo billaabay dhammaadkii sanadkii 2017.[4]

Geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ayaa sanadkii 2017-kii ka bilowday Koonfur-galbeed kadib ansixintii 3 Luulyo 2017 sharciga dowladda hoose ee Lr. 10 oo muhiim u ah dhismaha goleyaasaha deegaanka. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Koonfur-galbeed, oo gacan ka heleysa Finnish Church Aid (FCA), ayaa goleyaashii deegaan ee ugu horreeyay ka hirgelisay Xudur ee gobolka Bakool ah iyo Baradaale oo ka tirsan gobolka Bay bilihii Oktoobar 2017-kii iyo Diseembar 2018-kii, muddo xilleedkii madaxweynihii maamulkaas, Shariif Xasan Sheekh Aadan.[5] Madaxweynihii xigay ee maamulka dowlad-goboleedka hadda xilka haya Madaxweyne Cabdicasiis Xasan Maxamed Lafta-gareen ayaa goleyaal u sameeyay degmada Waajid ee gobolka Bakool bishii Abriil 2021-kii; Diinsoor ka tirsan Bay bishii Janaayo 2020-kii; iyo Buurhakaba ee gobolka Bay bishii Juun 2023-kii; iyo Baraawe oo ka tirsan Shabeellada Hoose bishii Nofeembar 2021-kii.[6] Dowlad-goboleedka waxay dhismaha goleyaasha deegaanka ka bilowday Baydhabo iyo Ceel-Barde bishii Diseembar 2017-kii, iyo bartamihii 2019-kii, balse waa la joojiyay.

Ilaa hadda, Goonfur-galbeed waxay siddeed iyo tobanka degmo ee gobollada maamulka ka samaysay lix gole deegaan. Waxay hannaanka ka bilowday degmada Ceelbarde ee gobolka Bakool. Sikastaba ha ahaatee, hawsha ayaa lagu hakiyay heerkii koowaad kadib khilaaf awood qeybsi oo ka dhashay.

Afar ka mid ah lixda degmo ee leh goleyaasha deegaanka ee lagu soo xulay nidaamka dadban ee Koonfur Galbeed isticmaaleysay ayaa ah degmooyinka darajada B (Bardaale, Diinsoor, Waajid, Buurhakabo) oo leh min 21 kursi. Labo degmo oo kala ah Waajid oo ah xarunta gobolka Bakool iyo degmada Baraawe oo ah caasimadda rasmiga ah ee Koonfur-galbeed ayaa leh 27 xubnood oo gole deegaan ah.[7] Xubnaha golaha deegaanka ee degmooyinkan ayaa waxaa si dadban usoo doortay ergo beeleed ka kooban shan xubnood oo ay soo xuleen odayaasha beelaha ee kursi kasta ee golaha deegaanka.

Muddada golaha deegaanka Xudur waxay ku ekeyd Oktoobar 2021-kii laakiin gole labaad ayaa si dadban dib loogu soo doortay Sebteembar 2022-kii. Hase yeeshee geedi-socodku ma ahayn mid nabad ah; Xiisad ayaa ka dhalatay kadib markii beesha Shiirmooge ee degmada dega ay weerar ku qaadeen guri uu ku sugnaa wasiirka arrimaha gudaha Koonfur-galbeed

3 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Koonfur-galbeed, Baydhabo, 25ka Oktoobar 2023.

4 Wareysi lala yeeshay xubin ka tirsan bulshada rayidka Baydhabo, 25 Oktoobar 2023.

5 Ibid.

6 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha Koonfur-galbeed, Baydhabo, 25-ka Oktoobar 2023.

7 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Koonfur-galbeed, Baydhabo, 25ka Oktoobar 2023.

iyagoo ka gadoodsan in kursigooda ay ku metesho qof dumar ah.[8] Dhacdadan ayaa sababtay dhimashada hal qof oo kasoo jeeda beesha Shirmooge.[9]

Sidoo kale, isku daygii Wasaaradda Arrimaha Gudaha Koonfur-galbeed ee ahaa in doorasho dadban dib loogu dhiso golaha cusub ee degmada Bardaale Nofeembar 2022-kii ayaa waxaa ka dhashay colaad ka dhex dhacday beesha Leysaan oo ah qabiilka ugu badan ee dega degmada.[10] Dhacdadan markii ay faaftay, qaar kamid ah dadka deegaanka ayaa farta ku fiiqay madaxda dowlad-goboleedka in ay rabeen dib-u-doorashada maayarka uu wakhtigiisu dhamaaday oo la sheegay in uusan aqbalaad iyo taageero ka heysan odayaasha beesha iyo inta badan qabiilka.[11] Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedka ayaa ku sii adkaystay taageeridda dib-u-doorashada golaha cusub. Arrintan ayaa cirka isku sii shareertay, waxaana labada dhinac dhexmaray dagaal sababay dhimashada 4 qof iyo dhaawaca dad kale.[12] Waxay xiisadda sii korortay kadib markii degmada laga sameeyay labo gole deegaan oo isbarbar socda.[13]

Arrintan ayaa socotay muddo sanad ka badan ilaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Koonfur-galbeed ay kala dirtay golaha lagu muransanaa, ayna magacaawday maamul kumeelgaar ah 26-kii Disembar 2023.[14] Intaa waxaa dheer, Senator ka tirsan beesha Leysaan ayaa soo farageliyay bishii Oktoobar 2023 si uu u xalliyo arrinta. Sikastaba ha noqotee, dadaallada dib-u-heshiisiinta waxaa caqabad ku noqday daadadkii El Nino ee ku dhuftay dowlad-goboleedka iyo maamulka Koonfur-galbeed oo diiradda u weeciyay baahiyaha degdegga ah ee dadka daadadku saameeyeen.[15]

Waqtigan la joogo, Koonfur-galbeed waxay leedahay afar degmo oo leh goleyaal deegaan: Baraawe, Xudur, Burhakaba, iyo Waajid. Degmooyinka kale sida Bardaale iyo Diinsoor hadda ma lahan gole deegaan maadaama labada gole la kala diray. Degmooyinkan ayaa hadda waxaa maamula maamullo kumeelgaar ah.[16]

Geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka iyo dib-u-doorashada ee Koonfur-galbeed ayaa abuurtay iyo/ama kicisay iskahorimaadyo u dhexeeya bulshooyinka ku nool degmooyinkaas. Degmada Baraawe, geedi-socodka ayaa sababay khilaaf ka dhex aloosmay bulshada degta degmada. Iska horimaad ayaa ka dhex dhacay maleeshiyaadka ciidamada Hawiye iyo ciidamada amniga ee Koonfur-galbeed, kaasoo salka ku hayay qoondeynta kuraasta xubnaha golaha deegaanka ee beelaha kala duwan ee degmada dega. Sida lagasoo xigtay ilo u dhawaa dhacdada, xaaladdu waxay kacday kadib markii wasaaradda arrimaha gudaha ee Koonfur-galbeed ay isku dayday inay iska indhatirto heshiis ay gaareen beesha Tuni, oo ah

8 Wareysi lala yeeshay oday dhaqan, Baydhabo, 31 Oktoobar 2023.

9 Ibid.

10 Wareysi lala yeeshay xubin ka tirsan bulshada rayidka Baydhabo, 25 Oktoobar 2023.

11 Ibid.

12 Ibid.

13 Ibid.

14 Ibid.

15 Wareysi lala yeeshay cilmibaare aqoon u leh Koonfur-galbeed, WhatsApp, 14 Disembar 2023.

16 Wareysi lala yeeshay xubin ka tirsan bulshada rayidka Baydhabo, 25 Oktoobar 2023.

qabiilka ugu badan ee dega Baraawe, iyo beesha Hawiye ee ku sugan degmada, heshiiskaasoo u aqoonsanaya beesha Hawiye in ay golaha deegaanka metelaad ku yeelato. Sikastaba ha noqotee, arrinta waxaa lagu xaliyay in Hawiye loo qoondeeyay afar xubin oo ka tirsan golaha deegaanka iyo maayarka koowaad.[17]

Ka sokow arrintan, goleyaasha deegaanka ee Koonfur-galbeed ayaa ah kuwo ay adag tahay in la fahmo. Waxaa jira muran joogto ah oo u dhexeeya maayarada iyo xubnaha golaha deegaanka, tanina waxay ka dhigtay maamulka mid fadhiid ah. Dhammaan ka qeygaleyaashii dood-kooxeedyadii iyo wareysi xog-ogaaleedyadii aan ka sameynay Koonfur-galbeed ayaa arrintan ku sababeeyay dhowr arrimood. Waxaa kamid ahaa hannaanka oo lagu degdegay; geedi-socodka oo ay faragelinayeen hoggaanka maamulka si ay natiijooyin ay iyagu doonayaan ugasoo baxdo; golaha deegaanka oo la isugu geeyay dad aan lahayn aqoon iyo karti; iyo arrimo kale oo carqaladeeyay shaqadooda iyo jiirtaankooda oo aan uga hadli doonno qeybaha hoose kuwaasoo ku saabsan dhibaatooyinka la wajahay intii lagu jiray dhismaha goleyaasha deegaanka, iyo caqabadaha hortaagan shaqeyntooda.

## 3.2 Hirshabeelle

Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ayaa ah dowlad-goboleedkii ugu dambeeyay ee xubin ka noqota Dowladda Federaalka, waxaana la dhisay dhamaadkii 2016, iyadoo la isku daray gobollada Hiiraan iyo Shabeellada Dhexe. Waxaa lagu dhisay hannaan lagu muransanaa waxaana loo dedejiyay doorashadii baarlamaanka federaalka oo soo dhawaa. Hannaankani wuxuu wiiqay heshiiska siyaasadeed ee dowlad-goboleedka, taasoo tan iyo wakhtigaas ka dhigyay maamulka mid kala qeybsan. Sidoo kale, dhismaha dowlad-goboleedka ma aysan abuurin jawi ku habboon dhismaha goleyaasha deegaanka.

Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ayaa ka kooban 12 degmo (7 degmo oo ku taalla gobolka Shabeellada Dhexe iyo 5 degmo oo ku taalla gobolka Hiiraan). Sikastaba ha ahaatee, waxaa la ansixiyay 8 degmo oo cusub muddadii u dhexeysay 2022 iyo 2023, taasoo kordhisay tirada degmooyinka oo noqday 20 oo 12 kamid ah ay jireen kahor 1991.[18]

Geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ayaa Hirshabeelle ka bilowday sanadkii 2018. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedka ayaa geedi-socodka ka bilowday degmooyinka Warsheekh iyo Jowhar ee gobolka Shabeellada Dhexe, iyo degmooyinka Buulo Barde iyo Beledweyne ee gobolka Hiiraan. Sikastaba ha ahaatee, degmada Warsheekh ayaa ahayd goobta kaliya ee laga dhisay gole deegaan, waxaana dhismihii golaha deegaanka ee degmada Jowhar lasoo gabagabeeyay dabayaaqadii bishii Oktoobar 2023.

Geedi-socodka dhismaha golaha deegaanka ee Warsheekh ayaa bilowday 2018-kii, waxaana lasoo gebagebeeyey Ogosto 2019-kii, iyadoo ay maalgelisay Somali Stability Fund (SSF)[19] sidoo kalena uu hirgeliyay Somali Youth Development Network (SOYDEN), oo ah hay'ad maxalli ah,

17 Wareysi aan la yeelanay xildhibaanka degmada Baraawe.

18 Wareysi sarkaal sare oo ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Hirshabeelle, Jowhar, 10-ka Oktoobar, 2023.

19 Wareysi lala yeeshay guddoomiyaha NGO maxalli ah oo fulinaya mashruuc dhismaha golaha deegaanka ah ee Hirshabeele, Muqdisho, 21 May, 2023.

oo si dhow ula shaqeynayay Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Hirshabeelle.[20] Kuraasta golaha deegaanka oo ka kooban 21 xubnood ayaa loo qeybiyay beelaha/jufooyinka dega degmada, kuwaasoo ay ugu badan yihiin Reer Mataan iyo Celi Cumar.[21]

Muddo-xileedkii golaha deegaanka degmada Warsheekh ayaa ku ekaa bishii Ogosto 2023-kii, sidaas awgeed, Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedka ayaa soo gabagabeysay doorashada 21-ka xubnood ee golaha deegaanka degmada oo loo maray nidaam doorasho dadban ah toddobaadkii labaad ee Janaayo 2024, iyadoo la isticmaalayo awood-qeybsigii horey loo sameeyay. Doorashada labaad ee golaha deegaanka ee degmada Warsheekh waxaa fududeynayay FCA. Waxaa xusid mudan in golaha cusub uu kordhiyay metelaadda haweenka, iyagoo helay lix kursi, taasoo labo jibaar ka badan metelaadda haweenka ee golihii deegaanka hore.

Dhismaha golaha deegaanka ayaa magaalada Jowhar ka billaabatay bishii May 2019-kii. Sikastaba ha ahaatee, howsha ayaa joogsatay oo hakad ku jirtay muddo shan sano ah sababo la xiriira khilaafka u dhexeeyay shanta beelood ee ugu waaweyn degmada – Abgaal, Shiidle, Moobileen, Gaaljecel, iyo Xawaadle – ee qoondeynta 27-ka kursi ee golaha deegaanka degmada xarunta u ah dowlad-goboleedka Hirshabeelle.

Degmadu waxay lahayd 21 xubnood oo gole deegaan ah, oo ay 1993-kii sameysay UNOSOM, waxaana wakhtigaas kuraasta loo qeybiyay beelaha – Abgaal 8, Shiidle 6, Gaaljecel 4, Moobileen 2, iyo Xawaadle 1 – iyadoo sida la sheegay lagu saleeyay sahan tirakoob oo ay degmada ka sameeyeen UNOSOM, sida ay sheegeen ilo-wareedyo ku sugan Jowhar oo ka qeyb qaatay daraasaddan. Tijaabadaas ayaa lasoo jeediyay inay saldhig u noqoto qeybinta 27-ka kursi ee golaha deegaanka cusub ee Jowhar.[22]

Sikastaba ha ahaatee, beelaha qaarkood, sida Gaaljecel, Xawaadle, Moobileen, ayaa muujiyay sida ay u diiddan yihiin qeybsigii hore, oo ay ku macneeyeen in Abgaal iyo Shiidle oo kaliya uu nidaamku faa'iido u leeyahay, waxayna ku doodeen in xilligii golaha deegaanka hore la dhisayay dalka uu ka socday dagaalkii sokeeye oo sababay in qaar kamid ah dadka deegaanka ay isaga cararaan degmada.[23]

Inkastoo beelahani ay kasoo horjeesteen in loo noqdo awood qeybsigii kuraasta golaha deegaanka ee 1993-kii, haddana beelahani ayaa ku dooday in 6-da kursi ee cusub ee lagu daray 21-kii kursi ee hore loo qeybiyo oo kaliya Moobileen, Gaaljecel, iyo Xawaadle oo horey u haystay saami yar oo ka mid ah qoondadii hore, lagana reebo qeybsiga 6-da kursi Abgaal iyo Shiidle oo horey u heystay saami badan oo ka mid ah golaha deegaanka hore ee 1993-kii.[24]

Arrintan ayaa soo jiitameysay muddo afar sano ka badan (Bartamihii 2019 ilaa 2023) ilaa uu Madaxweynaha dowlad-goboleedka Hirshabeelle soo jeediyay in si siman min hal kursi loogu

---

20 Ibid.

21 Ibid.

22 Wareysi sarkaal sare oo ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Hirshabeelle, Jowhar, 10-ka Oktoobar, 2023.

23 Ibid.

24 Ibid.

daro saamigii hore ee beel kasta, lana hakiyo kursiga lixaad ilaa laga gaarayo go'aan ku aaddan beesha mustaqbalka qaadan doonta kursigan. Tani waxay xallisay caqabaddii ugu weyneyd ee hakisay geedi-socodka.[25]

Kadib markii arinkan la xaliyay, dhowrkii marxaladood ee u dambeeyay ee dhameystirka dhismaha golaha deegaabka (sida soo xulista ergada, tababaridda ergada, doorashada xubnaha golaha degmooyinka iyo doorashada maayarka iyo ku xigeennada) ayaa lasoo gabagabeeyay labadii toddobaad ee ugu dambeeyay bishii Oktoobar 2023. Jowhar hadda waxa ay leedahay gole deegaan iyadoo noqotay degmadii labaad ee gole deegaan leh ee katirsan Dowlad-goboleedka Hirshabeelle.

Dowlad-goboleedka wuxuu leeyahay labo gole degmo; Jowhar iyo Warsheekh. Wasaaradda Arrimaha Gudaha Hirshabeelle ayaa magaalada Buula Barde kaga dhawaaqday geedi-socodka dhismaha golaha deegaanka. Sikastaba ha ahaatee, marxaladihii hore ee geedi-socodka ayaa hakad ku yimid sababo aan si faah faahsan uga doodi doono qeybta hoose ee lagu taxliilinayo caqabadaha hortaagan in goleyaal deegaan laga dhiso magaalooyinka waaweyn ee Hirshabeelle.

## 3.3 Galmudug

Dowlad-goboleedka Galmudug oo laga aasaasay isutagga gobollada Galguduud iyo Koonfurta Mudug, waxaa la dhisay bishii Luulyo 2015-kii, waxa uu lahaa 10 degmo oo jiray kahor 1991; 7 kamid ah waxay ku yaallaan gobolka Galgaduud, halka 3-da kalena ay ka tirsan yihiin gobolka Mudug. Intaa waxaa dheer, dowlad-goboleedka ayaa 2022-kii iyo 2023-kii ansixiyay sagaal degmo oo cusub: shan gobolka Galgaduud ku yaalla, iyo afar koonfurta gobolka Mudug ku yaalla. Wadarta degmooyinka Galmudug kahor 1991-kii iyo kadib ayaa ah 19 degmo (12 ku yaalla gobolka Galgaduud iyo 7 ka tirsan gobolka Mudug).[26] Sikastaba ha ahaatee, muddada ay warbixintan qoristeedu socoto, saddexda degmo ee kala ah Ceel Buur, Masagawaay, iyo Ceel dheer oo ka tirsan Galgaduud waxaa gacanta ku haya Al-Shabaab.

Muddo-xilleedkii ugu horreeyay ee maamulka Galmudug (Luulyo 2015-kii ilaa Luulyo 2019-kii) waxaa gaabis ahaa geedi-socodka dhismaha golaha deegaanka, mana ahayn arrin mudnaan gaar ah u leh maamulka maadaama uu xilligaasi khilaaf kala dhexeeyay urur-diimeedkii markaas hubeysnaa ee Ahlu Sunna Wal Jamaaca oo maamulayay goobo muhiim ah oo ay ka mid ahayd Dhusamareeb, oo ah caasimadda maamulka. Ka sokow khilaafka ASWJ, maamulka waxaa u suurtagashay in uu billaabo geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka, islamarkaana uu meelmariyo Sharciga Dowladda Hoose sannadkii 2017-kii.

Geedi-socodka ayaa dib usoo cusboonaaday bartamihii 2020-kii, kadib doorashadii madaxweynaha talada qabtay horraantii sanadkaas ee Axmed Cabdi Kaariye "Qoorqoor".[27] Ilaa iyo hadda, dowlad-goboleedka Galmudug ayaa ku guuleysatay in uu sameeyo 7 gole

25 Ibid.

26 Wareysi lala yeeshay mas'uul ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha dowlad-goboleedka Galmudug, Dhuusamareeb, 29 Luulyo 2023.

27 Wareysi lala yeeshay mas'uul sare oo ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Dowlad-Goboleedka Galmudug, Dhuusomareeb 30-ka Luulyo 2023.

deegaan; shan kamid ah waxay ka dhisan yihiin degmooyinkii ka horeeyay 1991-kii (Galkacyo, Cadaado, Dhuusamareeb, Cabudwaaq, iyo Balanbale).[28] Labada degmo ee kale ee gole deegaan loo sameeyay ayaa labaduba degmo laga dhigay 2021-kii (Guriceel & Xeraale).[29] 7-daas degmo, Dhuusamareeb iyo Gaalkacyo ayaa ah degmooyinka ku jira 'darajada A' halka shanta degmo ee soo hartay ay yihiin 'darajada B'.

Geedi-socodka dhismaha golaha deegaanka ayaa ku bilowday sameynta guddi farsmo oo ka kooban 9 xubnood oo iskugu jira 4 wakiil oo ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta iyo Dowladaha Hoose ee dowlad-goboleedka Galmudug iyo 5 xubnood oo ka tirsan baarlamaanka dowlad-goboleedka.[30] Geedi-socodka ayaa bishii Luulyo 2020-kii ka bilowday degmada Cadaado.[31] Waxaa la filayey in howsha ay noqoneyso mid habsami u soconaysa maadaama degmadu ay tan iyo 2011-kii lahayd gole deegaan. Hase yeeshee, geedi-socodka ayaa hakad galay kadib markii khilaaf awood qeybsi uu ka dhex aloosamay jufooyinka Saleebaan ee ka tirsan beesha Habar gidir.[32] Tani waxa ay keentay in Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedka ay horay uga sii socoto oo ay hawsha ka bilowdo (koonfurta) Gaalkacyo dabayaaqadii Luulyo 2020-kii.[33]

Hannaanka oo xawaare ku socday ayaa kusoo dhamaaday magacaabista xubnaha golaha deegaanka ee degmada Galkacyo (koonfurta) iyo doorashadii ku xigtay ee duqa iyo ku xigeenka bishii Oktoobar 2020-kii. Degmo ahaan Galkacyo (koonfur) oo ku jirta darajada A, ayay ahayd in ay yeelato 27 xubnood oo golaha deegaanka ah. Sikastaba ha ahaatee, tirada ayaa laga dhigay 29 xubnood si loo qanciyo beelaha laga tirada badan yahay ee dega Gaalkacayo (koonfurta), iyo Saruur oo katirsan beesha Habar Gedir, oo deegaanno ku leh Koonfurta Mudug oo ay Gaalkacyo u tahay xarunta gobolka.[34]

Intaas kadib, waxaa hakad galay hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee Galmudug kadib markii madaxda dowlad-goboleedka ay si weyn ugu mashquuleen doorashooyinka xildhibaannada federaalka. Sikastaba ha ahaatee, geedi-socodka ayaa la sii waday, si xawli ahna loo billaabay kadib markii la soo gabagabeeyay doorashada federaalka bishii May 2022-kii. Dhismaha goleyaasha degmooyinka ayaa mar kale mudnaan u noqday hoggaanka maamulka. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta Galmudug ayaa lix bilood gudahood 5 gole deegaan ka kala dhistay degmooyinka Cadaado, Guriceel, Balanbale, Cabudwaaq, iyo Dhuusamareeb – Luulyo ilaa Disembar 2022-kii. Sidoo kale Luulyo 2023-kii ayay Wasaaraddu soo gabagabeysay dhismaha golaha degmada Xeraale.

---

28 Ibid.

29 Ibid.

30 Wareysi aan la yeelanay xildhibaan katirsan degmada Cadaado, Cadaado, 27 Luulyo 2023.

31 Ibid.

32 Ibid.

33 Ibid.

34 Wareysi lala yeeshay mas'uul ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha dowlad goboleedka Galmudug, Dhuusamareeb, 29 Luulyo 2023.

Arrinka ka muuqata dhismaha goleyaasha deegaanka Galmudug ayaa ah in 3 kamid ah shanta degmo ee 'darajada B' ah ay leeyihiin 23 kursi; taasoo ka dhigan labo kursi oo dheeri ka ah 21-ka kursi ee ku xusan Xeerka Dowladaha Hoose. Halka labada degmo kale ee, Balanbale iyo Xeraale ay leeyihiin goleyaal deegaan oo ka kooban 21 xubnood oo waafaqsan nidaamka sharciga ah. Sidoo kale, labada degmo oo 'darajada A' ah – Dhuusomareeb iyo Galkacyo (koonfur) – waxay leeyihiin goleyaal deegaan oo ka badan tirada sharciga ku qoran ee kuraasta loo oggolyahay: 33 xubnood ayuu ka kooban yahay golaha deegaanka Dhuusamareeb iyadoo uu 29 xubnood yahay golaha deegaanka Gaalkacyo.

Sikastaba ha ahaatee, mas'uuliyiin ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Galmudug ayaa arrinkan ku macneeyay in tirada dheeriga ah ay ka dhalatay tabashooyin dhanka metelaadda ah oo ay qabeen beelaha. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee maamulka oo hawshan hoggaamineysay ayaa xalka u arkay in ay kuraas ku daraan, waxayna dardargelisay dhismaha goleyaal deegaan oo loo dhan yahay.[35] Mas'uuliyiintan oo hadalkooda sii wata ayaa xusay in 23-ka kursi ee golaha deegaanka Cadaado ay jireen kahor inta aan la billaabin hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee Galmudug, waxa ayna ku dhisanaayeen heshiis dhex maray beellaha deggan degmada. Sidaas darteed, dowlad-goboleedka Galmudug waxay tixgelisay nidaamka awood-qeybsiga kuraasta golaha deegaanka ee horey u jiray.

### 3.4 Falanqeyn Isbar-bardhig ah

Saddexda qeybood ee kore waxay muujinayaan dhismaha goleyaasha deegaanka ee saddexda dowlad-goboleed. Waxaa laga sameyn karaa isbarbardhig. Saddexda dowlad-goboleed ayaa lagu dhisay nidaamyo lagu muransanaa oo aan mudnaanta siinin xallinta raadadkii laga dhaxlay colaadaha sokeeye ee daba dheeraaday taasina waxay si cad uga muuqatay hannaankii dhismaha goleyaasha deegaanka.

Koonfur-galbeed ayaa ahaa maamulkii ugu horeeyay saddexda dowlad-goboleed oo dhisay gole deegaan saddex sano kadib markii la dhisay maamulka bishii Nofeembar 2014. Maamulka ayaa dhisay 6 gole deegaan (3 gobolka Bay ah, 2 gobolka Bakool ah, iyo hal Shabeelada Hoose ah) muddadii u dhexeysay Oktoobar 2017-kii ilaa Juun 2023-kii. Lixdaas gole deegaan ee la dhisay, afar degmo oo keliya ayaa hadda leh gole deegaan, halka Bardaale iyo Diinsoor aysan lahayn gole deegaan. Sikastaba ha ahaatee, dhismaha golaha deegaanka iyo dib-u-doorashadii golaha deegaanka Bardaale waxaa ka dhashay xiisad salka ku haysa awood qeybsiga beelaha oo sababtay dhimasho. Waxaa xusid mudan, in kuraasta golaha deegaanka ee laga sameeyay Koonfur-galbeed ay u jaan-go'naayeen kuraasta loo qoondeeyay darajada A, iyo B; 27 iyo 21 siday u kala horreeyaan. Muddo-xileedka saddex gole deegaan ayaa dhamaatay; Golaha deegaanka Xudur ayaa dib loo doortay; Doorashadii golaha deegaanka ee Bardaale ayaa fashilantay oo waxa ay hadda degmada leedahay maamul kumeelgaar ah; iyo ugu dambeyn degmada Diinsoor oo la filayo in gole deegaan doorasho dadban lagusoo doorto, balse hadda waxay leedahay maamul kumeelgaar ah kadib markii golaha deegaanka la kala diray. Geedi-socodka dhismaha goleyaahsa deegaanka ee dhammaan 6-da degmo ee Koonfur-galbeed ayaa ahaa mid lagu dhisay maalgelin hay'ado.

35 Wareysi lala yeeshay mas'uul sare oo ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Dowlad Goboleedka Galmudug, Dhuusomareeb 30-ka Luulyo 2023.

Si ka duwan Koonfur-galbeed, Galmudug oo la aas-aasay 2015-kii, ayaa sameynta goleyaasha deegaanka billowday 2020-kii. Geedi-socodku ma uusan ahayn mid si xiriir ah u socda. Waxa uu maamulka 2023-kii dhismaha gohihii deegaan ee ugu dambeeyay ka hirgeliyay degmada Xeraale. Waxa ay Galmudug leedahay tirada ugu badan ee gole deegaan, oo wadar ahaan ah 7 gole deegaan, taasoo ka dhigan in uu yahay maamulka ugu badan goleyaasha deegaanka ee saddexda dowlad-goboleed. Dhammaan dhismaha goleyaashan deegaan marka laga reebo labo kamid ah, waxa la hirgeliyay iyadoo aanay jirin maalgelin iyo taageero maaliyadeed oo dibadda ah.

Si ka duwan Koonfur-galbeed iyo Hirshabeelle, kuraasta shan gole deegaan ee laga sameeyay toddobada degmo ee Galmudug waxay hareer marsan yihiin tiradii loo dejiyay degmooyinka ee darajada A iyo B ee ku qeexan sharciga dowladaha hoose iyo qaab dhismeedka qaran ee Wadajir. Shan kamid ah toddobada degmo ee leh goleyaal deegaan waa degmooyinka darajada B, saddex kamid ahna waxay leeyihiin 23 xubnood oo gole deegaan ah, labana waxay leeyihiin 21 xubnood, halka labada soo hartay ay yihiin degmooyinka darajada A – Dhuusamareeb; magaalo madaxda maamulka; iyo (Koonfurta) Galkacyo; magaalo madaxda koonfurta gobolka Mudug – waxay leeyihiin 33 iyo 29 kursi sida ay u kala horreeyaan. Intaa waxaa dheer, labo kamid ah toddobada gole deegaan waxay leeyihiin xuduudo ka dambeeyay 1991-kii waxaana la sameeyay 2022-kii iyo horraantii 2023-kii. Dhismaha goleyaasha deegaanka ee Galmudug ayaa lagu fuliyay si nabad ah, marka laga reebo Caabudwaaq iyo Balanbale oo xiisado ka dhashay awood qeybsi la sheegay inay sababtay dhimasho iyo dhaawac. Dhammaan goleyaasha deegaanka waxay ku shaqaynayaan xilligoodii ugu horreeyay mana jiro duq magaalo oo la riday ama gole deegaan oo la kala diray, sida ka dhacday degmooyinka Koonfur-galbeed.

Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ayaa dabayaaqadii 2016-kii lagu dhisay hannaan muran badan si lamid ah dowlad-goboleedyada kale. Hannaanka dhishama golaha deegaanka ayaa bilowday 2018-kii, waxaana ay u suurtagashay in uu maamulka gole deegaan ka dhiso degmada Warsheekh Ogosto 2019-kii. Waxa uu maamulka leeyahay labo degmo oo leh gole deegaan, Warsheekh ee uu muddo-xileedka golaha deegaanka ku ekaa Ogosto 2023-kii, iyo Jowhar oo la sameeyay dabayaaqadii Oktoobar 2023. Hannaanka ayaa ahaa mid aanan rabshado wadan balse in la dhiso Golaha Deegaanka degmada Jowhar ayaa qaadatay ku dhawaad shan sano.

Dhammaan hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee saddexda dowlad-goboleed ayaa muddo gaaban lagusoo gabagabeeyey. Waxaa intaa dheer, sida ay inoo sheegeen dadkii lagu wareystay dood-xookeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada waxaa dhammaan hannaanka gacanta ku hayay hoggaanka dowlad-goboleedyada si ay u soo saaraan xubno gole iyo maayarro ay iyagu wateen. Hoggaanka dowlad-goboleedyada ayaa inta badan ka saaray jilayaasha kale ee muhiimka ah sida bulshada rayidka ah, odayaasha dhaqanka, haweenka, iyo dhalinyarada. Waxaa ka qeybgalay hannaanka odayaasha beelaha balse doorkoodu waxa uu ku koobnaa oo kaliya soo xulista ergada.

# 4.0 Jilayaasha Dhismaha Goleyaasha Deegaanka

Sida ay sheegeen ka qeyb-galayaasha dood-kooxeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada laga sameeyay saddexda dowlad-goboleed, jilayaal badan ayaa heerar kala duwan uga qeyb qaatay geeddi-socodka. jilaayaashaas waxaa ugu waaweynaa Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada; Xildhibaannada dowlad-goboleedyada ee kasoo jeeda degaan-doorashooyinka laga dhisayay goleyaal degmo; ururrada maalgelinayay; odayaasha beelaha; iyo bulshada rayidka ah. Sikastaba ha ahaatee, ka qeyb-galayaasha daraasadda ayaa cadeeyay in inta badan jilayaasha aysan saameyn badan ku lahayn natiijada degmooyinkooda marka loo eego saameynta ballaaran ee Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada. Waxaa qeybta hoose lagu gorfeynayaa doorka jilayaashan:

## 4.1 Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada

Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada ayaa ah jilayaasha sharci ahaan mas'uulka ah hoggaaminta geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ee goobaha ay xukumaan, iyagoo isticmaalaya sharciyada, siyaasadaha, iyo qaab-dhismeedyada la xiriira. Wasaaradaha Arrimaha Gudaha waxay maamuleen geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ilaa hadda la dhisay. Sikastaba ha ahaatee, inta badan ka-qaybgalayaasha dood-koxeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada ee saddexda maamul ayaa Wasaaradaha Arrimaha Gudaha dowlad-goboleedyada ku eedeeyay in ay fuliyeen amarrada tooska ah ee uga imaanayay madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada sidaas darteedna ay geeddi-socodka u maamulayeen si ay u soo saaraan natiijooyinka ay rabaan madaxdooda. Tani waxay soo saartay xubno gole deegaan iyo maayarro daacad u ah madaxda dowlad-goboleedyada, balse aan lahayn mabaadi'da ay ku dhismaan goleyaasha deegaanka sida wada-lahaansho bulshado iyo isla xisaabtan.

isagoo sharraxaya ajendayaasha qarsoon ee madaxda sare ee dowlad-goboleeyada ay ka lahaayeen soo-saarista natiijooyin ay rabaan, mas'uul ka tirsan maamulka Galmudug oo geedi-socodkan ku howlanaa ayaa dhahay:

*"Madaxweynuhu wuxuu rabay inuu hubiyo in dadka uu isaga doonayey loo doorto maayarro kuwaasoo ka caawin doona in dib loo doorto haddii doorasho qof iyo cod ah [maamulka] laga qabto."* [36]

## 4.2 Xildhibaannada iyo wasiirrada heer dowlad-goboleed

Xildhibaanno iyo wasiirro heer dowlad-goboleed ah ayaa la sheegay in ay ku lug lahaayeen hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka ay kasoo jeedaan. Sikastaba ha ahaatee, ma aysan ahayn kuwo ka hor imaan karay saameynta muuqata ee madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada si ay u go'aamiyaan natiijooyinka, balse waxay dhismaha goleyaasha deegaanka ee deegaanadooda kala shaqeynayeen hoggaanka Dowlad-goboleedyada. Sida

36 Wareysi lala yeeshay mas'uul ka tirsan maamulka Galmudug, Dhuusamareeb, 29 Luulyo 2023.

ay sheegeen ka qeyb-galayaasha daraasadda, xildhibaannada Dowlad-goboleedyada ayaa geeddi-socodka uga qeyb-qaadanayay hubinta in beelahooda ay metelaad ka helaan golaha deegaanka. Xildhibaanada heer federaalka ayaa iyagana isku dayay inay soo dhex-galaan hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee deegaanada ay metelaan, gaar ahaan kuwa Koofur-galbeed. Sikastaba ha ahaatee, sida uu sheegay xubin bulshada rayidka katirsan oo jooga Baydhabo, maamulka Koonfur-galbeed ma aanu oggolaan xildhibaannada federaalka ee aan saaxiibka la ahayn in ay ku lug yeeshaan geeddi-socodkii dhismaha golaha deegaanka Buurhakaba ee socday Juun 2023.[37]

## 4.3 Odayaasha dhaqanka

Odoyaasha dhaqanka waa jilayaal muhiim u ah geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka, balse natiijada ka soo baxday saddexda dowlad-goboleed ayaa muujinaya in doorka odayaashu uu ahaa mid aad u yar kuna ekaa doodaha awood qeybsiga iyo soo xulista ergada qabiilka (ergadaas oo kadib dooranayay musharraxiinta jufo kasta). Ka sokow doorkan xaddidan ee ay odayaasha lahaayeen, haddana dadkii aan ka wareysannay Koonfur-galbeed ayaa sii sharraxay in kaliya la howl-gelinayay odayaasha saaxiibada la ah madaxda dowlad-goboleedka kuwaasoo uu hubay maamulka in ay dantiisa ka shaqeynayaan, halka kuwa aysan isku wanaagsanayn hoggaanka maamulka oo la rumeysan yahay inay go'aanno ay iyaga leeyihiin qaadan karaan loo diiday in ay ku lug yeeshaan geedi-socodka.[38] Xog-ogaal Baydhabo ku sugan ayaa ka sheekeeyay sida oday beeleed looga xayuubiyay hab-maamuuskiisii dhaqanka, ayna Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedka beddeshay, kadib markii uu kasoo horjeestay gole deegaan lagu muransanaa oo ay Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedka ka dhistay degmada Bardaale.[39] Isaga oo arrintan ka hadlaya ayuu yiri:

*"Danta ugu weyn[ee uu [maamulka Koonfur-galbeed] ka lahaa geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka waxa uu ahaa inay si buuxda gacanta ugu dhigaan golaha deegaanka iyo maayarka, sidoo kale [iyaga] inay u shaqeeyaan markasta oo ay doonaan. Haddii ay damcaan in ay beddelaan maayarka, marka ay u arkaan in uusan ku habboonayn fulinta ajendahooda, waxay isugu yeeri karaan golaha deegaanka oo ay ku amri karaan inay doortaan maayar kale."*[40]

Sidoo kale, oday beeleed daraasaddan loogu wareystay Baydhaba ayaa ku dhaliilay mas'uuliyiinta dowlad-goboleedka in odayaasha ay ka door bidaan siyaasiyiinta marka ay joogto go'aan ka gaarista cidda u qalanta xubinta golaha deegaanka.[41]

## 4.4 Bulshada rayidka ah

Inkastoo ay muhiim tahay doorka bulshada rayidka ah ee geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka, jawaab-bixiyeyaasha badankood ayaa hoosta ka xariiqay in kooxaha bulshada rayidka aysan door/saameyn dhab ah ku yeelan geeddi-socodka lagusoo saarayay goleyaasha

37 Wareysi lala yeeshay xubin ka tirsan bulshada rayidka, Baydhabo, 25 Oktoobar 2023.

38 Wareysi lala yeeshay xubin ka tirsan bulshada rayidka, Baydhabo, 25 Oktoobar 2023.

39 Wareysi lala yeeshay dhalinyaro, Baydhabo, 22 Oktoobar 2023.

40 Wareysi lala yeeshay dhalinyaro, Baydhabo, 22 Oktoobar 2023.

41 Wareysi lala yeeshay oday-dhaqameed, Baydhabo, 22 Oktoobar 2023.

deegaanka ee degmooyinka ay ka howlgalaan. Dhanka kale, ma jiraan jilayaal bulsho rayid heer degmo ah oo abaabulan kuwaasoo cadaadis saari kara dowlad-goboleedyada. Tabardarrada bulshada rayidka ma aha mid heer degmo keliya ku kooban balse ururrada noocan ah kaalin muuqata kuma laha heer qaran, taasoo keeni lahayd in lala xisaabtamo masuuliyiinta haya xilalka dowladda ee heer kasta.

## 4.5 Hay'adaha deeq-bixiyeyaasha

Dadkii aan ka wareysannay saddexda dowlad-goboleed ayaa tilmaamay in ay jiraan hay'ado, ururro caalami ah iyo kuwa aan dowli ahayn oo maxalli ah labaduba oo qeyb ka ahaa hannaanka. Dhanka Galmudug, mas'uuliyiin ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedka ayaa sheegay in maalgelin qeyb ahaan uga timid FCA ay fududeysay geeddi-socodkii dhismaha golaha deegaanka Gaalkacyo (Koonfurta), iyo degmada Cadaado, halka shanta degmo ee kale uu maamulku howshaas qabanayay iyadoo aan wax dhaqaale ka baxsan kan maamulka la helin. Taas beddelkeeda, labada gole deegaan ee Hirshabeelle laga dhisay, Warsheekh, iyo Jowhar, waxaa lagu dhisay dhaqaale laga helay Somali Stability Fund (SSF), iyo FCA siday u kala horreeyaan. Dib-u-doorashada golaha deegaanka degmada Warsheekh ee hadda socda waxaa fududeeyay FCA. Sidoo kale, USAID, UNDP, iyo FCA ayaa la sheegay inay gacan ka geystaan dhismaha goleyaasha deegaanka Koonfur-galbeed. Sikastaba ha ahaatee, xog-ogaallada aan wareysannay ee ku kala sugan ee saddexda maamul ayaa muujiyay in hay'adaha maalgelinta dibadda aysan wax door ah ku yeelan natiijada geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka. Doorkoodu waxa uu kaliya ahaa korjoogteyn. Mas'uul sare oo ka tirsan dowlad-goboleedka Galmudug ayaa ku tilmaamay ujeedka hay'adaha deeq-bixiyeyaasha dibadda "*inay doonayaan in si guul leh loo dhammeeyo geeddi-socodyada dhismaha goleyaasha deegaanka ee ay maalgaliyeen si ay u dardargeliyaan hirgelinta geeddi-socodka una adeegsadaan guushaas codsiga dhaqaale ee mashaariicda mustaqbalka*."[42]

Sikastaba ha ahaatee, la'aanta iyo/ama ka saaridda ka qeybqaadashada (firfircoon) ee jilayaasha muhiimka ah ee kor looga hadlay ee habraacyada dhismaha golaha deegaanka ayaa muujinaya soo socoshada dadaallada kor ka imaanaya ee doorashooyinka ee loo arko mid aan ku habbooneyn, sharciyaddiisu hooseyso, aan sidoo kale waxtar u lahayn muwaadiniinta. U daadejinya heer degmo nidaamyada lagu dhisay heer federaal iyo heer dowlad-goboleed ayaa soo saaray goleyaal deegaan oo aan ka duwaneyn maamulladii degmooyinka ee la magacaabi jiray ka hor dhismaha goleyaasha deegaanka marka la eego lahaanshaha bulshada, adeeg bixinta, iyo la xisaabtanka ee deegaannadan. Taas beddelkeeda, jawaab-bixiyeyaasha wareysi kooxeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada ayaa maayarrada iyo ku-xigeennada degmooyinka ku sifeeyay in ay yihiin kuwo ku xiran oo ay keliya la xisaabtamaan hoggaanka dowlad-goboleedyada. Sababta waa in (inta badan) lagu doortay oggolaanshaha madaxda dowlad-goboleedyadooda iyo in ay ka cabsanayaan in ay waayaan boosaskooda haddii ay ka horyimaadaan awaamiirta madaxda dowlad-goboleedka.

42 Wareysi lala yeeshay sarkaal sare oo ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Galmudug, Dhuusamareeb, 30 Luulyo 2023.

# 5.0 Carqaladaha geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ee Koonfur-galbeed, Hirshabeelle iyo Galmudug

Geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ee laga hirgeliyay saddexda dowlad-goboleed ayaa wajahay caqabado dib u dhigay sidoo kalena adkeeyay geeddi-socodka, sababayna natiijooyin khaldan. Inta badan geeddi-socodyada dhismaha goleyaasha deegaanka ee maamuladan waxa ay wajahayeen caqabado isku mid ah, waxaa sidoo kale jiray caqabado gaar u ahaa maamul kasta. Qeybtani waxaa looga hadlayaa toban caqabadood oo waaweyn oo jawaab-bixiyeyaashu ay tilmaameen in ay jireen mudadii hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka:

## 5.1 Hay'adaha deeqbixiyeyaasha

Saddexda dowlad-goboleed ee daraasaddan laga sameeyay – Koonfurgalbeed, Hirshabeelle, iyo Galmudug – waxay wadaagaan sifo guud oo ah in ay jiraan dakhli-uruurin hooseeysa. Arrinkan waxaa sabab u ah jiritaan la'aanta dekedo shaqeeya oo noqon kara isha dakhli ee ugu weyn sida dowlad-goboleedyada dhiggooda; Puntland iyo Jubaland, iyo sidoo kale dowladda federaalka Soomaaliya. Sidaas darteed, saddexda dowlad-goboleed waxay taageero miisaaniyadeed ka helaan dowladda federaalka si ay u bixiyaan mushaaraadka xildhibaanadooda iyo wasiiradooda.

Ka sokow caqabadahaan maaliyadeed ee muuqda, waxay ku dhawaaqeen dhismaha goleyaasha degmooyinka ee maamuladooda. Sikastaba ha ahaatee, geeddi-socodyada waxaa lagu billaabay maalgelin dibadda ah oo laga helay hay'ado horey u fulinayay mashaariicda dhismaha goleyaasha deegaanka ee Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, si loo hormariyo u daadejinta maamulka ee heer deegaan iyadoo la hirgelinayo nidaamka federaalka. Lacagaha dibadda ee hay'adahan ka yimaada waxay lagu bixiyay kharashaadka dadaallada ka horreeyay dhismaha goleyaasha deegaanka, iyo howlaha la qabtay intii uu socday dhismaha goleyaasha deegaanka.

Xogta laga helay Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada ayaa sheegay in dhismaha gole deegaan ee hal degmo uu ku kacayo qiyaastii USD 60,000-100,000. Lacagtan, sida lagasoo xigtay ilo-wareedyada, waxaa loogu talagalay in lagu daboolo howlaha dhismaha golaha deegaanka oo ay ku jiraan balse aan ku koobneyn la-tashiga bulshada; ka-qeybgelinta bulshada rayidka ah; qabashada barnaamijyada wacyigelinta bulshada; kulamada wada-hadalka bulshada; tababarka tababarayaasha si ay u agaamsimaan dhismaha golaha deegaanka; lacagaha loogu talagalay shaqaalaha ka tirsan Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedka ee fududeynaya hawsha.

Dadka la wareystay ayaa ku dooday in helitaanka maalgelin dibadeed ay nidaamka dhismaha goleyaasha degaanka dhibaato ku ahayd. Mas'uul ka tirsan maamulka Galmudug ayaa ku eedeeyay in hay'adaha dhaqaalaha bixiya ay adkeeyaan, mararka qaarna ay dib u dhigaan

habsami u socodka geedi-socodka.[43] Taas waxa u sabab ah, ayuu yiri, in hay'adaha maalgelinta ay u dhaqmaan sida guddi xallinta khilaafaadka ah iyaga oo qabanaya cabashooyinka ka imanaya beelaha/jufooyinka qeybta ka ah geedi-socodka.[44] Tani waxay sababtay in hawsha la xayirro ilaa laga xalinayo tabashooyinka.[45] Mas'uulkan ayaa sii sheegay sida ay Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Dowlad-goboleedka u arkeysay hay'adaha maalgelinayay:

*"Wasaaradda Arrimaha Gudaha [Galmudug] waxa ay ka-qeybgalka hay'adaha maalgelinaya hannaanka u arkaysay mid caqabad ku ah hor-u-socodka geeddi-socodka."*

Sikastaba ha ahaatee, masuul kale oo ka tirsan dowlad-goboleedka ayaa rumeysnaa in hay'adaha maalgelinta ay sidan u dhaqmeen iyagoo aaminsanaa in sidaas ay tahay habka saxda ah.[46]

Maalgelinta dibadeed ayaa fududeysay dhismaha golaha deegaanka ee Cadaado iyo (Koonfurta) Gaalkacyo, halka dowlad-goboleedka Galmudug ay dhismaha goleyaasha deegaanka shan degmo ku hirgelisay dhaqaalaheeda. Masuuliyiinta ka socotay Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedka ayaa dhaliilay muddada cayiman ee la isticmaali karo dhaqaalaha hay'adaha.[47] Sida uu sheegay mas'uul ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Galmudug, dhaqaalaha hay'adaha taageera dhismaha goleyaasha deegaanka wakhtigii loogu talo galay isticmaalkiisa waxa ay dhamaatay intii lagu jiray geedi-socodka, taasi waxay keentay in hay'adahaasi ay joojiyaan howlihii ay ka hayeen deegaannada maamulkaasi ilaa loogasoo fasaxo dhaqaale cusub.[48] Carqaladeyntan ayaa lagu andacoonay in ay kordhisay caqabadaha ka imaanayay beelaha/jufooyinka ay khuseyso, waxayna sababtay in amar kasoo baxay madaxweynaha Galmudug lagu sii wado howlaha degmooyinka loo qorsheeyay iyadoo aan la sugin goorta dhaqaale dibadda ah laga helo hay'adaha. Wuxuu u sheegay in ay dib ugu soo laabtaan hawsha marka ay diyaar u noqdaan.[49]

Jawaab bixiyeyaasha Hirshabeelle iyo Koonfur-galbeed ayaa ka hadlay saameynta dadban ee ay maalgelinta dibadda ku yeelatay dhismaha goleyaasha deegaanka. Xubin ka qeyb galay dood-kooxeedyadii Baydhabo ayaa sheegay in muujinta maalgelinta hay'adaha caalamiga ah ay abuuri karto aragti ah in dowladdu aysan ka go'neyn fulinta geeddi-socodka, waxaana laga yaabaa in ay horseeddo shaki dadka dhexdooda ah sababtoo ah geeddi-socodku wuxuu u muuqdaa kaliya inuu sii socon karo mar kasta oo ay hay'ad dhaqaale ku bixineyso.[50]

Qaar kamid ah ka qeyb-galayaasha ayaa ku dooday in maalgelinta dibadda ee dhismaha goleyaasha deegaanka ay dhiirigeliso hab-dhaqanka dhaqaale-uruursiga ee masuuliyiinta

43 Wareysi lala yeeshay mas'uul ka tirsan maamulka Galmudug, Dhuusamareeb, 30 Luulyo 2023.

44 Ibid.

45 Ibid.

46 Wareysi lala yeeshay mas'uul ka tirsan maamulka Galmudug, Dhuusamareeb, 29 Luulyo 2023.

47 Wareysi aan la yeelanay mas'uul ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Galmudug, Dhuusomareeb, 29 Luulyo 2023.

48 Ibid.

49 Ibid.

50 Ka-qaybgale wareysi kooxeed, Baydhabo, 22 Oktoobar 2023.

maamulka ku howlan geeddi-socodka, taasoo sii dheeraynaysa geeddi-socodka.[51] Sidoo kale, waxa ay sii ballaarisaa fikradda mashruuca deeq-bixiyeyaasha kaasoo kordhiya ku tiirsanaanta sidoo kalena niyadjabiya curinta siyaasado waxtar leh.[52]

## 5.2 Ku degdegidda geeddi-socodka

Geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka wuxuu ka kooban yahay marxalado iyo howlo isku xigxiga oo lagu qeexay Qaab-dhismeedka Qaran ee Wadajir si loo sameeyo goleyaal degmo oo ay bulshadu leedahay ayna hoggaamiso bulshada. Sikastaba ha ahaatee, jawaab-bixiyeyaashu waxay isku waafaqeen in geeddi-socodku ahaa mid lagu degdegay oo aan u hoggaansamin habraacyadii u degsanaa maamulka ama habraacyada iyo siyaasadaha/qaab-dhismeedyada kale ee jira. Iyagoo sharraxaya sida howsha degdeg u ahayd, qaar kamid ah jawaab-bixiyeyaasha oo ay ka mid yihiin masuuliyiin ka tirsan hay'adaha maalgeliya dhismaha goleyaasha deegaanka, ayaa xusay in geeddi-socodka uu ka booday tallaabadii aadka xasaasiga u ahayd ee qiimeynta khilaafyada, siyaasadda, dhaqaalaha, iyo amniga taasoo u sahli lahayd daneeyeyaasha ay khuseyso in ay go'aan ka gaaraan haddii deegaanka ku habboon yahay dhismaha gole deegaan iyo in kale.

Arrintan waxaa ka dhalatay in geedi-socodka dhismaha golaha deegaanka laga billaabo degmooyin ay ka jireen colaado qoto-dheer oo aan la xalin iyo kala qeybsanaan siyaasadeed. Markii nidaamka dhismaha golaha deegaanka laga billaabay degmooyin qaar, ka qeyb-galayaasha daraasaddu waxay sheegeen in Wasaaradaha Arrimaha Gudaha dowlad-goboleedyada ay soo gaabiyeen howlihii muhiimka u ahaa dhismaha goleyaasha deegaanka, sida wacyigelinta bulshada, dib-u-heshiisiinta, iyo bogsiinta bulshada. Waxay u boodeen heerkii awood-qeybsiga, taasoo noqotay hannaan cakiran, waxayna rabeen in si dhaqsa ah loosoo gabagabeeyo geedi-socodka.

Wiil dhalinyaro ah oo ka qeybgalay dood-kooxeedyada ayaa xusay in hannaanka dhismaha golaha deegaanka ee Buurhakabo iyo Bardaale muddo isbuuc ah lagusoo gabagabeeyay. Tusaalooyinka goleyaasha deegaanka ee sida degdegga ah loo sameeyay waa ay badan yihiin. Galmudug, hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee inta badan degmooyinka ayaa lagusoo gabagabeeyay muddo gaaban marka laga reebo Gaalkacyo, oo qaadatay lix bilood, iyo Cadaado oo qaadatay ilaa labo bilood.

Dhanka Hirshabeelle, dowlad-goboleedka ayaa bishii Oktoobar 2023-kii dib u billlaabay geeddi-socodkii dhismaha golaha deegaanka ee Jowhar oo muddo shan sano ah hakad ku jiray, waxaana lagusoo gabagabeeyay labo toddobaad gudahood. Ku degdegidda geedi-socodka waxa uu xaddiday fursadii ay bulshadu si waafi ah ugu fahmi lahayd dhismaha golaha deegaanka oo ay uga wada shaqeyn lahaayeen. Sida uu sheegay xog-ogaal lagu wareystay degmada Cadaado, degdeggani wuxuu ku dhammaaday natiijo aan xiriir la lahayn bulshadii ay khuseysay, waxaana ka dhashay tabashooyin.[53] Diiradda dowlad-goboleedyada iyo hay'adaha

---

51 Wareysi lala yeeshay Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowlad goboleedka Hirshabeelle, Jowhar, 10 Luulyo 2023.

52 Ibid.

53 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Cadaado, 27 Luulyo 2023.

deeq-bixiyeyaasha ayaa kaliya ahayd in gole deegaan la sameeyo balse wax badan kama fikirin in geedi-socodka uu horseedi karo natiijooyin ama saameyn taban oo ka dambeysa dhismaha golaha deegaanka.

## 5.3 Faragelin siyaasadeed

Daraasaddu waxay ogaatay in daneeyayaasha muhiimka ah ee geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ay door yar ku leeyihiin ama aysan door ku lahayn geedi-socodka, waxa ayna muujinayeen keliya in ay qeyb ka yihiin. Taa beddelkeeda, hoggaanka sare ee dowlad-goboleedyada ayaa saameyn ku lahaa geeddi-socodka iyagoo adeegsanaya Wasaaradaha Arrimaha Gudaha. Ilo-wareedyo ayaa sheegay in ay daneynayeen hubinta in maayarro iyo ku-xigeenno ay saaxiibo yihiin loo doorto degmooyinka goleyaasha deegaanka laga sameeyay.

Arrintaa si ay u gaaraan, waxa ay saameyn ku yeesheen odayaasha beelaha oo mas'uul ka ah magacaabista ergada beelaha/jufooyinka si aan rasmi ahayn u soo xulaya musharraxiinta kursi kasta. Tusaale ahaan, madaxda Galmudug ayaa la sheegay in ay xaqiijiyeen in inta ugu badan musharrixiintooda loo doorto duqa magaalada iyo jagooyinka ku-xigeenka duqa magaalada ee dhamaan magaalooyinka waaweyn marka laga reebo Gaalkacyo oo ay madaxda dowlad-goboleedku ku guul-darreysteen in ay qofkii ay wateen maayar ka dhigaan. Waxay diidmo xooggan kala kulmeen bulshada ku dhaqan Koonfurta Gaalkacyo, waxaana sidaas ku hirgalay rabitaanka dadka deegaanka.[54] Ujeedka ay ka lahaayeen madaxda sare ee dowlad-goboleedka Galmudug ay soo baxaan maayarro saaxiibo la ah ayaa la xiriirta arrimo siyaasadeed, amni iyo dhaqaale.[55] Maamulka ma uusan faragelin nidaamka dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka yaryar ee aan lahayn awood dakhli sidoo kalena aan khatar amni ku keeneyn danaha madaxda dowlad-goboleedka.[56]

## 5.4 La'aanta iyo/ama xaddidnaanta maalgelin dhaqaale

Sida aan ka ogaannay ilo xog ogaal ah oo daraasaddan lagu wareystay, dhismaha hal gole deegaan kharash badan kuma baxayo. Sikastaba ha ahaatee, dhismaha goleyaasha deegaanka qoondeyn miisaaniyadeed ugama aysan jirin miisaaniyad sanadeedka dowlad-goboleedyada. Tani waxay qeyb ahaan la xiriirtaa dakhli-uruurinta xaddidan oo aan ku filnayn in lagu bixiyo kharashaadka howl-maalmeedka.

Natiijo ahaan, goleyaasha deegaanka tirada yar ee laga dhisay saddexda dowlad-goboleed waxaa fududeeyay maalgelin dibadda ah. Tani waxay dowlad-goboleedyada dhaqaale ahaan jilcan ka hor istaagtay inay billaabaan dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyin badan. Waxay taas beddelkeeda sugeen inay maalgelin dibadeed u helaan degmooyinka si looga billaabo dhismaha golaha deegaanka. Kaliya Galmudug ayaa ku dhiiratay in ay sii waddo hannaanka waxa ayna dhiseen goleyaasha deegaanka ee shan degmo oo ka mid toddobada degmo ee goleyaal deegaan loo sameeyay iyagoo aan helin taageero maaliyadeed oo dibadda ah. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Galmudug ma aanay hakin dhaqaale la'aanta dibadeed,

54 Wareysi lala yeeshay mas'uul ka tirsan maamulka Galmudug, Dhuusamareeb, 30 Luulyo 2023.

55 Ibid.

56 Ibid.

waxa ayna dabooshay kharashaadka ku baxay dhismaha goleyaasha deegaanka ee ka imaanayay lacagaha lagu bixinayay warqadda dambi la'aanta ee laga qaadayay labada musharrax ee u tartamaya kursi kasta oo xubnaha golaha deegaanka ah iyo sidoo kale lacagaha laga qaado xubnaha ku tartamaya kuraasta golaha deegaanka, Maayarka iyo Maayar ku-xigeenka.[57]

## 5.5 Murannada ku saleysan awood-qeybsiga

Natiijooyinka kasoo baxay guud ahaan goobaha daraasadda laga sameeyay ayaa muujinaya in awood-qeybsiga uu ahaa qeybta ugu adag ee dhismaha goleyaasha deegaanka kaasoo qaadanayay waqti badan. Sidoo kale, waxa uu dib-u-dhac ku keenay waqtiyada kama dambeysta ah ee loo dejiyay soo gabogabeynta dhismaha goleyaasha deegaanka ee dowlad-goboleedyada. Sababtuna waa in habraaca uu loollan ka dhex dhaliyay beelaha/jufooyinka gudahooda iyo/ama qabiilada/jufooyinka oo doonayay in ay qeyb weyn ka helaan kuraasta golaha deegaanka ee tirada xaddidan ah. Waqti ayaa loo baahday si loo xalliyo arrintan si loogu gudbo marxaladaha xiga.

Beelo/jufooyin gaar ah ayaa degmo kastaa sheegta in ay yihiin kuwa ugu badan degmadaas, sidaas darteedna waxay isu arkaan in ay xuquuq u dhalasho ahaan u leeyihiin tirada ugu badan ee kuraasta degmadaas. Beelaha/jufooyinka kale ee ku dhaqan degmooyinkaas ayaa soo bandhigay sheegashooyin diidmo ah waxayna dalbadeen in kuraas la mid ah ay helaan. Loollanka beelaha ayaa noqday meelaha ugu badan ee uu dagaalku ka dhashay kaasoo horseeday khasaaro isugu jira dhimasho iyo dhaawac.

Marka loo eego natiijooyinka ka soo baxay Koonfur-galbeed, geeddi-socodkii dhismaha goleyaasha deegaanka ee dowlad-goboleedkan waxaa dhacay dhacdooyin salka ku hayay awood-qeybsi oo sababay dhimasho. Degmada Baraawe ayaa ahayd degmadii ugu dambeysay oo ay ka dhacaan falal noocaan oo kale ah oo u dhexeeyay beesha Hawiye, oo dhinac ah iyo dadka asal ahaan degganaaa deegaanka iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowlad goboleedka, colaaddaas oo ku saleysneyd metelaadda Hawiye ee golaha deegaanka ee la dhisayay. Dhacdadan ayaa sababtay dhimashada ugu yaraan hal qof. Sikastaba ha ahaatee, xaaladdu waa la xalliyay iyadoo metelaad (4 kursi oo golaha deegaanka ah) loo oggolaaday beelaha Hawiye ee degmada dega oo lagu daray xilka maayar ku xigeenka.[58]

Galmudug, xiisado ka dhashay awood-qeybsi ayaa ka dhacay degmooyinka Caabudwaaq iyo Ballanballe kuwaasoo sababay dhimasho iyo dhaawac. Taas cagsigeeda, geeddi-socodkii dhismaha goleyaasha deegaanka ee Hirshabeelle ma uusan sababin wax dagaal ah balse khilaaf ka dhashay awood-qeybsiga 27-ka xubnood ee golaha deegaanka Jowhar ayaa sababay hakinta geedi-socodka muddo shan sano ah iyadoo hannaanka dib loo billaabay bishii Oktoobar 2023-kii sidoo kalena lagu soo gabagabeeyay dhowr maalmood oo isla bishaas ah.

Muranka ku saabsan awood-qeybsiga kuraasta golaha degmooyinka ayaa ahaa mid qaraar sababtoo ah sida ay ilo-wareedyada aan wareysannay inoo sheegeen, beelaha/jufooyinka ayaa

57 Wareysi lala yeeshay sarkaal sare oo ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Galmudug, Dhuusamareeb, 30 Luulyo 2023.

58 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Baraawe, 4ta Diseembar 2023.

halbeeg ka dhigtay saamiga ay ku yeelanayaan golaha deegaanka. Sidaas awgeed, waxa ay heerka metelaaddooda la simeen heerka kuraasta ay ku leeyihiin golaha deegaanka. Aragtidan baahsan ayaa hareysay oo bulshooyinka ka indho beelisay inay arkaan faa'iidooyinka ka imaan kara in la helo dowlad hoose halkii ay ku adkaysan lahaayeen inay ilaashadaan tiro cayiman oo kuraasta golaha deegaanka ah.

## 5.6 Khibradda loo leeyahay dhismaha goleyaal deegaan oo yareyd

Dowlad-goboleedyada dhisay goleyaasha deegaanka ma yasan lahayn khibrad hore ee geeddi-socodkan ah si la mid ah hababka kale ee siyaasadeed ee loo daadejinayay dowlad-goboleed. Aragtida oo dhami waxay ahayd mid ku cusub goobaha laga hirgeliyay dhismaha goleyaasha deegaanka, iyo sidoo kale masuuliyiinta kormeeraysay.

Arrintan ayaa caqabad weyn ku noqotay bulshada, Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad goboleedyada iyo xitaa hay'adaha maalgaliyeyaasha ah, maadaama uusan jirin aas-aas hore oo wax lagu dhisayo. Sidaas darteed, dadkii ka shaqeynayay hannaanka waxay ka shaqeynayeen hirgelinta nidaamka iyagoo aan hagitaan cad ka haysan arrimaha adag ee ay la kulmi karaan iyo xalalka suuragalka ah.

Xaaladdan waxa ay saameyn ku yeelatay geeddi-socodkii iyo natiijooyinkii kasoo baxay. Sikastaba ha ahaatee, mas'uuliyiinta maamulka ee ka shaqeynayay nidaamyadaan ayaa laga yaabaa in ay casharro ka barteen hirgelinta geedi-socodka dadban ee dhismaha goleyaasha deegaanka, balse waxaa weli dhiman in goleyaal deegaan lagusoo doorto codka dadweynaha taasoo hawl adag noqoneysa. Balse, ugu yaraan, dowlad-goboleedyadu waxay khibrad iyo casharro ka heleen habraacyada dhismaha goleyaasha deegaanka ee ay sameeyeen oo talaabooyin guul leh u noqoneysa degmooyinka kale ee haray. Waxa ay ugu yaraan ka fogaan doonaan in ay mar kale dhacaan khaladaadkii dhacay inta uu socday geedi-socodyadii hore ee dhismaha goleyaasha deegaanka, waxa ayna aragti ahaan horseedi kartaa geedi-socodku noqdo mid fudud oo ay bulshadu leedahay sidoo kalena qalalaasihiisu yaryahay.

## 5.7 Xasarad-abuurka heer degmo

Jileyaasha heer degmo sida gudoomiyeyaasha degmooyinka ee maamuladii kumeelgaarka ahaa ee la magacaabay, ciidamo beeleedyo, ganacsato ayaa lagu tilmaamay inay qaswadayaal ku noqdeen fulinta goleyaasha deegaannadooda. Waxaa lagu eedeeyay in ay door bidayeen in xaaladdu sideeda ahaato. Jilayaashan ayaa lagu dhaleeceeyay in ay caqabado u abuureen dadaalladii ka socday degmooyinka ee lagu dhisayay goleyaal deegaan, iyagoo ka baqaya in golaha deegaanka cusub uu qatar ku noqdo faa'iidooyinka muddada dheer ay ku heysteen deegaannada oo aan cidna kula xisaabtami jirin.

Gudoomiyeyaashii hore ee degmooyinka waxay ahaayeen xoogag caqabad ku ah geedi socodka dhismaha goleyaasha deegaanka maadaama ay ku naaloonayeen dhaqaalaha ay ka heli jireen maareynta qeybinta gargaarka bini'aadannimo ee degmooyinka. Dad xog-ogaal ah oo lagu wareystay dhammaan dowlad-goboleedyada ayaa hoosta ka xarriiqay in guddoomiyeyaashii hore ee degmooyinka ay maamulayeen lacagaha ay hay'adaha gargaarka bini'aadannimo siin jireen dadka nugul ee ku nool degmooyinka. Waxa la sheegay inay qeyb ahaan usoo dhici jirtay

lacagaha lagu diro sim-kaarka shirkadaha isgaarsiinta maxalliga ah. Sidaas darteed, ma aysan jeclayn inay u oggolaadaan habka dhismaha goleyaasha deegaanka oo ay halis gasho lacagtii ay helayeen. Hogaamiyayaasha dowlad-goboleedyada waxa ay la shaqeeyeen xubnahan iyagoo ku taageeray in ay maayarro ka noqdaan goleyaasha deegaanka ee laga sameeyay degmooyinka qaar.

Ciidamada deegaanka ayaa sidoo kale lagu sheegay in ay caqabad ku noqdeen hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee labada dowlad-goboleed ee Hirshabeelle iyo Koonfur Galbeed. Maleeshiyaadkan ayaa dano ku qaba in xaaladda sideeda sii ahaato maadaama ay faa'iido ku qabaan madaxda degmooyinka iyo maleeshiyaadkaba. Taliyeyaasha maleeshiyaadka ayaa lacago ka sameeya lacagaha baadda ah ee ay ka qaadaan degaannadan waxaana maleeshiyada ay ku nool yihiin lacagahaasi. Ilo wareedyo ayaa sheegay in maleeshiyadu ay ka walaacsan yihiin in dhismaha goleyaal deegaan ay hoos u dhigeyso ilahooda dhaqaale ee ugu weyn. Intaa waxaa dheer, dadkii lagu wareystay daraasadda ayaa tilmaamay in ganacsatada qaarkood ay geeddi-socodka uga horjoogsadeen daaha gadaashiisa iyagoo ku dadaalayay in dadka ay wateen loo doorto maayarro, si ay uga caawiyaan mashaariicda mustaqbalka ee la imaan doona kadib marka gole deegaan la dhiso.

## 5.8 Musuqmaasuq

Daraasadda waxay ogaatay in musuqmaasuq, oo u badan iibsashada codadka, uu ka dhacay dhammaan heerar kala duwan dhismaha goleyaasha deegaanka iyadoo ku xirneyd xaaladda degmada iyo awooddeeda dakhli. Xog-ogaal muhiim ah oo la wareystay oo ay kamid yihiin xildhibaanno heer degmo ah, mas'uuliyiin ka tirsan Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada, iyo dad ku lug lahaa geeddi-socodka oo leh saameyn kala duwan ayaa carrabka ugu adkeeyay in iibsashada codadka xildhibaannada golaha deegaanka ee xilligii doorashada duqa degmada ay ahayd mid ku baahday geeddi-socodkii dhismaha goleyaasha deegaana ee degmooyinka.

Sida natiijada kasoo baxday, cod iibsasho ayay sameeyeen musharraxiinta ku tartamayey xilalka maayarka iyo ku-xigeenka. Musharraxiinta u tartamayay xilka maayark ayaa la sheegay in ay bixiyeen lacag ka badan kuwa u tartamayay maayar ku xigeenka maadaama kala duwan yihiin maqaamka labada xil. Sidoo kale, xogta ayaa muujisay in lacagta ay labada musharrax ee duqa iyo ku xigeenkuba u shubeen xubnaha golaha deegaanka ay ku kala duwan yihiin hadba sida uu tartanka u xoogganaa, darajada degmada, A ama B, iyo sidoo kale dhaqaalaha degmada, oo u badan gargaarka bini'aadannimo iyo canshuurta.

Xogta waxay muujisay in ay jiraan habab kale oo ka baxsan lacag bixinta oo ay ku saameeyeen xubnaha golaha deegaanka. Tusaale ahaan, sida uu sheegay qof ku sugan Cadaado, dowlad-goboleedka Galmudug ayaa sameeyay ballan-qaadyo ku aadan in ay beelaha qaarkood ku abaal-marin doonto xilal agaasimayaasha guud ah haddii ay u taageeraan musharraxa u taagan xilka duqa magaalada ee uu dowlad-goboleedku wato.[59]

Musuqmaasuqa noocan oo kale ah ayaa go'aamiyay natiijada. Dad xog-ogaal ah oo lagu wareystay Baydhabo ayaa ka sheekeeyay nin xaraashay dhulkiisa iyo ganacsigiisa si uu ugu

59 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Cadaado, 27 Luulyo 2023.

guuleysto xilka duqa degmada Bardaale.[60] Sikastaba ha ahaatee, labo khasaare ayaa soo gaartay ninkan; waxa uu ku guul darreystay in uu helo jagadii uu doonayey, waxa uu sidoo kale waayey lacagtiisii ee uu si musuq ah u qeybiyay.[61]

## 5.9 Beddelidda joogtada ah ee Wasiirada Arrimaha Gudaha iyo Agaasimayaasha Guud

Isbedellada ku yimaada Wasiiradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada iyo agaasimayaasha guud ayaa qeyb ka ahaa caqabadaha ka jira hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee Hirshabeelle. Ka qeybgalayaasha daraasadda ayaa sheegay in Wasiiradda Arrimaha Gudaha iyo agaasimaha guud – oo howsha billaabay, lana qabsaday – xilalkii ay hayeen laga qaaday, kadibna waxaa hakad ku yimid dhismaha goleyaasha deegaanka, iyadoo masuuliyiinta cusub ay u baahanaayeen waqti dheeraad ah oo ay ku fahmaan qaabka ay howsha ku socotay.

## 5.10 Amni(daro)

Arrimaha la xiriira amniga ayaa culeysyo waaweyn ku keenay hirgelinta dhismaha goleyaasha deegaanka ee Hirshabeelle iyo Koonfur-galbeed, welina culeyskaas waa uu ka jiraa Koonfur-galbeed. Hirshabeelle, ka qeyb-galayaasha dood-kooxeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada waxay si muuqda uga hadleen saameynta amni, gaar ahaan khatarta al-Shabaab, ee geeddi-socodka dhismaha golaha deegaanka ee Jowhar iyo magaalooyinka kale oo hawsha laga iclaamiyay balse uu hakad ku yimid.

Tusaale ahaan, Intii lagu guda jiray dhismaha golaha deegaanka ee magaalada Jowhar, al-Shabaab ayaa ku sugneyd Hirshabeelle, waxayna arrintan muujisay qatar amni ee dhismaha golaha deegaanka ee Jowhar oo la iclaamiyay 2018-kii. Sida uu sheegay mas'uul sare oo ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Hirshabeelle, kooxdu waxay joogeen dhul dhowr kiiloomitir u jirta degmada Jowhar waxayna saameyn ku lahaayeen degmada.[62]

Arrintan ayaa odeyaashii ka dhigtay kuwa ka caga-jiida in ay isku yimaadaan ayna kawada qeyb-qaataan doodaha dhismaha golaha deegaanka ee Jowhar, iyagoo ka baqanaya in ay al-shabaab u dhibaateeyaan ka qeybgalka doodahaas.[63] Qaar kamid ah odayaasha beelaha ayaa degaanno ku leh tuulooyinka ku teedsan degmada. Mas'uul aan wareysannay ayaa sheegay in ay cabsida sii kordhisay xaqiiqda ah in kooxdu ay xogo ku saabsan shirarka iyo muuqaallada ka soo qeyb-galayaashu ka heleen dad si hoose ula shaqeeya.[64]

Dhanka kale, geeddi-socodkii dhismaha goleyaasha deegaanka ee Koonfur-galbeed ayaa dhibaato kasoo gaartay khatarta ay al-Shabaab ku hayso maamulka. Kooxda ayaa ka talisa afar degmo oo ka tirsan maamulka halka ay inta badan degmooyinka go'doon ku jireen muddo ka badan toban sano. Go'doomintan oo weli jirta ayay kooxdu ku diiday in xagga dhulka loo soo

60 Wareysi lala yeeshay xog-ogaal da'da yar, Baydhabo, 22 Oktoobar 2023.

61 Ibid.

62 Wareysi lala yeeshay mas'uul ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Hirshabeelle, Jowhar, 10 Luulyo 2023.

63 Ibid.

64 Ibid.

maro degmooyinkaas. Intii ay socotay howsha dhismaha goleyaasha deegaanka, xog-ogaalka aan wareysannay ayaa sheegay in mas'uuliyiinta maamulka iyo howl-wadeennada kale ay diyaaradaha helicopter-ka ah ku tagayeen degmooyinka go'doonsan, si ay geedi-socodka uga hirgeliyaan.[65] Tani waxa ay ku cuslaatay ka-qeybgalka dad daneynayay inay raadiyaan kuraasta golaha deegaanka balse aan ku sugneyn degmada.

65 Wareysi lala yeeshay xubin ka tirsan bulshada rayidka, Baydhabo.

## 6.0 Metelaadda dhalinyarada, dumarka, iyo beelaha la heybsooco ee goleyaasha degmooyinka

Qeybtan waxay eegaysaa metelaadda dhalinyarada, haweenka, iyo beelaha la haybsooco ee goleyaasha deegaanka ee ilaa hadda la sameeyay ee saddexda dowlad-goboleed. Waxay soo bandhigaysaa kooxda ugu badan saddexda kooxood oo heysta metalaadda golaha deegaanka; iyo tirada boqolleeyda haweenka ee katirsan gole deegaan kasta oo ka mid ah 15 gole deegaan (7 Galmudug ah, 6 Koonfur-galbeed ah, iyo 2 Hirshabeelle ah). Waxa ay sidoo kale sharraxeysaa sababta metelaadda dumarku uu aad uga hooseeyo qoondada 30% ee haweenka ee lagu dejiyay sharciga, siyaasadaha, iyo qaab-dhismeedyada hagaya geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka. Sidoo kale, waxay si kooban u qeexeysaa ka saaridda iyo ku daridda goleyaasha deegaanka ee kooxaha kale ee la heybsooco.

Marka la eego guud ahaan goleyaasha deegaanka ee saddexda dowlad-goboleed, dhallinyarada ayaa ah xubnaha ugu badan. Sida muuqata, goleyaasha deegaanka ayaa ah madal ay dhallinyarada – oo lagu qiyaaso in ay yihiin 70% shacabka – ku leeyihiin metelaad ballaaran. Inkastoo uu muran ka taagan yahay da'da saxda ah ee 'dhallinyarada', ayaa xildhibaan ka tirsan golaha deegaanka Cadaado oo la wareystay waxa uu sheegay in 18 kamid ah 23-ka xildhibaan ee golaha deegaanka Cadaado ay yihiin dhallinyaro da'doodu u dhexeyso 20-40 sano.[66] Sidoo kale, golaha deegaanka (koonfurta) Galkacyo waxa uu leeyahay xildhibaano da'yar. Sida uu sheegay xildhibaan katisan golaha deegaanka Gaalkacyo, 29-ka xubnood ee golaha deegaanka, saddex xildhibaan oo kaliya ayaa jira da' gaareysa 50 sano ama ka weyn.[67]

Inkastoo ku badnaashaha dhalinyarada ee goleyaasha deegaanka ee dowlad-goboleedyada ay tahay calaamad togan oo in la bogaadiyo mudan marka la eego ka qeybgal la'aanta fursadaha kale, goleyaasha deegaanka ayaa ah kuwa ay aad ugu yar yihiin metelaadda haweenka iyo kooxaha kale ee la heybsooco. Guud ahaan dowlad-goboleedyada, daraasadda lagu sameeyay metelaadda haweenka ee goleyaasha deegaanka ayaa muujineysa in kuraasta goleyaasha deegaanka ee ay haweenku heleen ay aad uga hooseeyso qoondada 30% ee loogu dammaanad qaaday qaab-dhismeedka sharciga ee dowladaha hoose.

Inkastoo ay jirto natiijadan taban ee dhismaha goleyaasha deegaanka kasoo baxday, Koonfur-galbeed ayaa ka duwan dowlad-goboleedyada kale marka loo eego in goleyaasha deegaanka uu leeyahay metelaadda ugu sareysa ee haweenka; qaarkood waxa ay geereen qoondada haweenka ee 30%; qaarna way ku dhawaadeen. Labo degmo oo ka tirsan Koonfur-galbeed, Diinsoor, iyo Buurhakaba, ayaa leh metelaadda ugu badan ee haweenka iyagoo kala heysta; 10 kamid ah 21-ka; iyo 9 kamid ah 21-ka siday u kala horreeyaan. Taas bedelkeeda, ma jiraan gole deegaan oo kamid ah 7-da gole degmo ee leh golaha deegaan ee Galmudug, iyo 2-da gole deegaan ee Hirshabeelle oo xaqiijiyay qoondada 30%.

66 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Cadaado, 27 Luulyo 2023.

67 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Galkacyo, 22 Luulyo 2023.

Intaa waxaa dheer, daraasaddu waxay ogaatay in haweenku aysan kaliya la kulmin metelaad yari goleyaasha deegaanka ah balse ay sidoo kale la kulmaan metelaad la'aan muuqata oo xaga duqa magaalada iyo ku xigeenkaba ah. Dhammaan xilalka duqa magaalada iyo ku xigeennadooda, kaliya hal xildhibaan oo dumar ah ayaa loo doortay ku xigeenka maayarka golaha deegaanka degmada Baraawe.

| Dowlad-goboleedka | Degmada | Kuraasta Golaha Deegaanka | Dumar | Boqolleyda metelaadda dumarka | Metelaadda beelaha la heybsooco |
|---|---|---|---|---|---|
| Galmudug | Gaalkacyo | 29 | 5 | 17% | 1 |
| | Cadaado | 23 | 3 | 13% | 0 |
| | Dhuusamareeb | 33 | 6 | 18% | 0 |
| | Caabudwaaq | 23 | 4 | 17% | 0 |
| | Balanbal | 21 | 5 | 2% | 0 |
| | Guriceel | 23 | 2 | 9% | 0 |
| | Xeraale | 21 | 1 | 5% | 0 |
| Hirshabelle | Warsheekh | 21 | 6 | 29% | 1 |
| | Jowhar | 26 | 3 | 12% | 0 |
| Koonfurgalbeed | Xudur | 27 | 7 | 26% | 0 |
| | Bardaale | 21 | 5 | 24% | 0 |
| | Diinsoor | 21 | 10 | 48% | 0 |
| | Waajid | 21 | 7 | 33% | 0 |
| | Baraawe | 27 | 7 | 26% | 0 |
| | Buurhakabo | 21 | 10 | 48% | 0 |

*Ilaha xogta: xog uu soo uruuriyay qoraaga daraasadda.*

*Tusmada 2-aad waxay muujinaysaa metelaadda haweenka iyo beelaha la hayb-sooco ee goleyaasha deegaanka ee saddexda dowlad-goboleed.*

Metelaadda hooseysa ee haweenka ee heer degmo ma ahan dhibaato gaar ku ah goleyaasha deegaanka balse waa mid ay haweenka kala kulmaan hay'adaha lasoo magacaabo heer dowlad-goboleed iyo heer federaalba. Marka la eego caqabadaha joogtada ah ee haweenka ka hor istaagaya in ay helaan metelaad cadaalad ah, ka qeybgaleyaasha dood-kooxeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada ayaa ku sababeeyay in ay caqabado dhowr ah salka ku hayso.

Hal sharraxaad oo ay kusoo celceliyeen dadkii ka qeyb galay dood-kooxeedyadii iyo wareysi xog-ogaaleedyadii ayaa ahayd doorka eexashada ku saleysan ee dhaqanka iyo fikaradaha khaldan ee haweenka laga aaminsan yahay. Dhaqankan ayaa la geeyay hay'adaha dowladeed

maadaama odayaashu ay yihiin kuwa taagan irdihii laga geli lahaa xafiisyada dowladeed. Odayaasha beelaha ayaa ah kuwa go'aamiya jufada hoose ee ku fadhiisanaysa kursiga golaha deegaanka iyo musharraxiinta suuragalka ah ee ka soo jeeda jufadaas gaarka ah. Waxa ay ku xisaabtamayaan awood qeybsiga beesha ka dhex jirta. Xaaladdaas, odayaashu waxa ay rabitaankooda ku muujiyeen inay ragga ka door bidaan dumarka markii ay musharraxiinta labada jinsiba u soo tartamaan kursi loo qoondeeyey beesha/jufada. Intaa waxaa dheer, odayaashu inta badan ma aysan qaadan awaamiirta Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada ee ahayd in qabiil kasta/jufo kasta oo leh saddex kursi, uu mid ka mid ah u qoondeeyo haweenka.

Caqabado dhaqameedyada haweenka ka horjoogsada inay ku biiraan goleyaasha deegaanka ayaa leh astaamo kala duwan. In ay guursadaan nin kasoo jeeda qabiil kale ayaa ah sabab ku filan in musharax dumar ah kursi loo diido. Ka qeybgaleyaasha dood-kooxeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada ayaa arrinka sidan ku macneeyay, balse haweeney ka mid ah haweenka degmada Cadaado oo ka qeyb gashay dood-kooxeed dumar keliya loogu qabtay degmada Cadaado ayaa inoo sheegtay in ay dhibane u ahayd guursiga nin ka soo jeeda jufo kale. Iyadoo ka sheekaynaysa waaya-aragnimadeeda waxay tiri:

*"Waxaan isku dayay inaan xubin ka noqdo golaha deegaanka, waxa aan la kulmay caqabado. Caqabadda aan la kulmay waxay ka timid go'aannada odayaasha jufada. Odayaashan ayaa arrinkayga ka dooday waxa ay igu takooreen in ninkeyga uu jufo kale kasoo jeedo. Waxay ku doodeen in qof aan jufada ahayn gabar qabta in aan la oggoleyn, iyagoo i weydiiyay inaan ka haro tartanka."*[68]

Inkastoo ay tahay sababeyn hooseysa, hab-dhaqannada takoorka ah ayaa salka ku haysa aragtida ah in haweeneyda guursta nin kasoo jeeda beel kale aysan u meteli karin danaha qabiilkeeda si la mid ah sida uu ninku u metelo. Balse, qabiilka/jufada uu ninkeeda kasoo jeedo ay si toos ah uga faa'iidayaan booskeeda.

Ka sokow arrimahan, kalsooni darrada dhextaalla haweenka u tartamaya goleyaasha deegaanka ayaa lagu tilmaamay inay caqabad ku tahay metelaadda haweenka. Ka qeybgalayaasha daraasadda ayaa sheegay in haweenka kusoo baxay goleyaasha deegaanka ay ahaayeen kuwa aan daneyneyn siyaasadda oo laga rabay keliya in ay muujiyaan in golaha deegaanka uu yahay mid loo dhanyhay si loo khiyaano ururrada deeq-bixiyeyaasha ah ee taageera ajendaha kawada qeybgalka bulshada.

Dhanka kale, kooxaha la heyb sooco (sida beelaha laga tirada badan yahay) ee degmooyinkii goleyaasha deegaanka laga sameeyay ayaan wax metelaad ah ku lahayn saddexda dowlad-goboleed marka laga reebo (Koonfurta) Galkacyo ee Galmudug iyo Warsheekh oo ka tirsan Hirshabeelle oo beelahani ay min hal kursi ku leeyihiin golaha deegaanka. Dadkii aan ka wareysannay degmada Baraawe ayaa sheegay in aysan degmada ka jirin kooxo la heybsooco.

68 Ka-qaybgale dumar ah ee wareysi kooxeed loo sameeyay dumar, Cadaado, 28 Luulyo 2023.

# 7.0 Caqabadaha hortaagan shaqeynta iyo waxqabadka goleyaasha deegaanka

Dhismaha goleyaasha deegaanka ayaa la filayay in ay keeni doonto maamullo xasiloon marka loo eego gudoomiyeyaashii hore ee degmooyinka ee lasoo magacaabi jiray. Waxa la rajeynayay in ay ilaa xad ka jawaabi doonto baahiyaha dadka deegaanku qabaan. Sikastaba ha ahaatee, rajadaasi ayaa meesha ka baxday maadaama goleyaasha deegaanka – oo lagu bixiyay lacag iyo waqti badan – ay hadda fadhiid yihiin. Dhanka kale, degmooyinkan kama xaalad wanaagsana sidii ay ahaayeen kahor dhismaha goleyaasha deegaanka. Arrintan waxaa sababay in goleyaasha deegaanka ay la kulmeen caqabado baaxad leh oo ka xannibay in ay gutaan waajibaadkooda loo idmaday. Haddii aan caqabadahan si dhab ah wax looga qaban oo aan xal wax-ku-ool ah laga gaarin, waxaa sii jiri doontaa shaqeyn la'aanta goleyaasha deegaanka, mana horseedi doonaan horumar ku yimaada nolosha dadka deegaanka.

Daraasaddu waxay ogaatay in ay jiraan caqabado waaweyn oo la xiriira shaqeyn la'aanta goleyaasha deegaanka ee saddexda dowlad-goboleed:

## 7.1 Hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka oo lagu degdegay

Jawaab bixiyeyaasha daraasaddu waxay eedda saareen xawaaraha hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ku socday in uu sababay soo bixidda goleyaal deegaan oo aan shaqeyneyn. Jawaab-bixiyeyaasha ayaa ku dooday in habkaas uu ahaa mid khaldan oo hareer maray tillaabooyinka muhiimka ah ee lagu dejiyay Qaab-dhismeedka Qaran ee Wadajir iyo sharciyada la xiriira ee dowlad-goboleedyada oo xaaladda goleyaasha deegaanka ka dhigi lahaa mid guuleysta.

Habka loo dhisay waxa uu sahladay shuruudaha Qiimeynta Khilaafka, Siyaasadda, Dhaqaalaha iyo Amniga oo gundhig u ah in Dhismaha Goleyaasha Deegaanka laga fuliyo goob gaar ah. Masuul sare oo ku sugan Baydhabo oo la wareystay ayaa mas'uuliyiinta ay khuseyso ee Koonfur-galbeed ku eedeeyay ee in aysan odorosin xaqiiqada dhabta ah ee iman karta kadib dhismaha goleyaasha deegaanka.[69] Intaa waxaa dheer, wuxuu sheegay in aysan jirin ujeedooyin la taaban karo oo ka dambeeyay dhismaha goleyaasha deegaanka balse, sida uu sheegay, geeddi-socodku uu kaliya ahaa 'mashruuc uu deeq-bixiye wado'.[70] La wareyste kale oo Baydhabo ku sugan ayaa wax laga xumaado ku tilmaamay in hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka aan mudnaanta lagu siin degmooyinka waaweyn ee ay dowladdu maamusho, taas beddelkeedana laga sameeyay degmooyin go'doonsan oo aan lahayn dakhli.[71] Intaa waxaa dheer, hannaanku waxa uu ahaa mid kor ka imaanayay (top-down) oo baal maray mabda'a dhismaha goleyaal deegaan oo ay dadka deegaanku leeyihiin.

---

69 Wareysi lala yeeshay mas'uul sare oo ka tirsan degmada Baydhabo, Baydhabo, 23 Oktoobar 2023.

70 Ibid.

71 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Koonfur-galbeed, Baydhabo, 25-ka Oktoobar 2023.

## 7.2 Tayada iyo kartida xubnaha goleyaasha deegaanka

Tayada iyo kartida xubnaha golaha waxa ay safka hore kasoo gashay arrimaha lala xiriirinayo shaqeyn la'aata goleyaasha deegaanka ee seddexda dowlad-goboleed. Goleyaasha deegaanka ayaa la sheegay in ay ku badan yihiin xubno aan buuxin shuruudaha ugu fudud ee xubinnimada goleyaasha deegaanka. Tani waxaa lala xiriiriyay xaqiiqda ah in dowlad-goboleedyadu aysan fulin shuruudaha ku qoran Xeerka Dowladaha Hoose.

Masuul ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Galmudug ayaa jebinta shuruudihii ugu yaraa ee looga baahanaa xubinnimada goleyaasha deegaanka ku sababeeyay in xaaladaha ka jira maamulka aysan weli ku habbooneyn in shuruudo noocaasi ah lagu dabaqo, haddii la dabaqi lahaana ay caqabad ku noqon lahayd geedi-socodka.[72] Jawaab-bixiyeyaasha saddexda dowlad-goboleed waxay sheegeen in goleyaasha deegaanka ay ku jiraan xubno aan awoodin inay qoraan ama akhriyaan magacyadooda iyagoo caawimaad weydiista xubnaha golaha kale marka baahidaas timaado.

Mas'uul kale oo ka tirsan maamulka Galmudug ayaa tilmaamay in ay odayaasha beelaha door ku leeyihiin mas'uuliyadda dhibaatadan. Wuxuu yiri:

*"Waxay dhacdaa marka labo musharax oo midi u qalmo jagadaas midna aanu u qalmin ay tartamaan, odayaashu waxay ka codsadaan musharaxa u qalma inuu u tanaasulo musharaxa kale ee aan u qalmin iyagoo u cuskanaya inuu shaqo heli karo halka kan kale ee aan u qalmin jagadaasna uu doonayo inuu guursado, xubinnimada golaha deegaankana ay ka caawin doonto inuu helo dhaqaale uu ku daboolo kharashaadka guurka."*[73]

Ka qeybgalayaasha daraasadda ayaa sharraxay in badi xubnaha golaha deegaanka ee degmooyinka ay ku nool yihiin ay ahaayeen shaqo la'aan iyo in xubinnimada golaha deegaanku ay tahay shaqadoodii ugu horreysay. Xubinnimada golaha deegaanka ayaa loo arkayay fursad shaqo. Taas keliya ma aha, balse goleyaasha deegaanka ayaa leh xubno firfircoon sida maayarrada iyo ku-xigeennada, sida ay sheegeen jawaab-bixiyeyaasha Koonfur-galbeed. Sikastaba ha ahaatee, tani maaha mid gaar u ah golaha deegaanka. Waxaa jira xildhibaanno heer dowlad-goboleed ah ku biiray hay'adaha sharci-dejinta sababtoo ah waxa ay heli karaan mushahar soconaya 4 ama 5 sano.

Sikastaba ha ahaatee, jawaab bixiyaasha (Koonfurta) Galkacyo, iyo Cadaado ayaa sheegay in degmooyinkoodu ay leeyihiin xubno gole oo leh aqoon iyo xirfado kala duwan waxa ayna sidoo kale ku jiraan ganacsi iyo xirfado kale marka laga reebo xubinnimada golaha deegaanka.

## 7.3 Fahamka hooseeya ee beelaha/xubnaha ka heystaan goleyaasha degmooyinka

Faham hooseeya iyo aragtiyo khaldan oo goleyaasha deegaanka laga heysto oo ka dhex jira bulshada iyo xitaa xubno katirsan goleyaasha deegaanka ayay ka qeyb-qaatayaasha dood-wadareedka iyo wareysi xog-ogaaleedka sheegeen in ay tahay caqabad waaweyn oo ku wajahan shaqeynta goleyaasha deegaanka. Fahamkaas liita iyo aragtiyada khaldan ayaa si qoto-dheer

---

72 Wareysi lala yeeshay mas'uul ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Galmudug, Dhuusamareeb, 30 Luulyo 2023.

73 Wareysi lala yeeshay mas'uul ka tirsan maamulka Galmudug, Dhuusamareeb, 30 Luulyo 2023.

ugu dhex milmay bulshada dhexdeeda taasoo ka turjumeysa sida ay daciif u tahay qadarinta bulshada ee dowladnimada iyo maamulka. Arrinkan ayaa soo korayay tobaneeyo sano waxaana lagu macneyn karaa kala fogaanta ballaaran ee u dhexeeysa dowladda iyo bulshada.

Sharraxaad kale ayaa noqon karta in goleyaasha deegaanka ay yihiin nidaam cusub marka loo eego xaaladda lagu sameeyay iyo bulshada deegaanka oo la qabsaday maamullo lasoo magacaabi jiray iyo hay'ado aan rasmi ahayn kuwaasoo qeyb ahaan qaadanayay doorka hay'ado dowladeed oo rasmi ah. Sikastaba ha ahaatee, jiritaanka fahamka hooseeya iyo fikradaha khaldan ee ay qabaan bulshooyinka iyo xubnaha goleyaasha deegaanka ayaa wax weyn u dhimaya waxqabadka goleyaasha deegaanka.

Daraasaddu waxay ogaatay in ay jiraan fikrad ay aaminsan yihiin beellaha iyo kuwa raba in ay xubno ka noqdaan goleyaasha deegaanka oo ah in ay goleyaasha deegaanku il dakhli oo wanaagsan yihiin marka loo eego heerka shaqo la'aanta iyo fursadaha shaqo oo yar. Tani waxay ka duwan tahay xaqiiqda ah in aysan jirin mushaar bille ah oo lagu helayo xubinnimada golaha deegaanka. Dadka xubinta ka noqda waa shakhsiyaad door ku leh qeybaha kala duwan ee nolosha wakhtigoodana qeyb kamid ah ugu shaqeeya golaha deegaanka. Maayarrada iyo xubnaha golaha oo lagu wareystay Galmudug ayaa inoo sheegay  in ay jirto gunno fadhi oo loo qorsheeyay in la siiyo xubnaha goleyaasha deegaanka, balse aan wali la siin xubnaha goleyaasha.

Aragtida ah in goleyaasha deegaanku dakhli leeyihiin kuma koobnayn oo kaliya dadka degmooyinka ku nool, balse waxaa la yaab leh, in ay jiraan shaqaale rayid ah ee heer dowlad-goboleed iyo heer federaal oo u maleynayay in jagada golaha deegaanka ay ka heli doonaan mushaar ka badan mushaarka shaqaalaha rayidka ah.[74] Xubin ka tirsan golaha deegaanka ee degmada Cadaado ayaa ka sheekeeyay sheeko ku saabsan shaqaale dowladeed oo iska casilay shaqadii dowladda federaalka uu ka qaadan jiray USD 700 isagoo u maleynayey in uu bil walba qaadan doono lacag dhan USD 2,000 haddii uu helo kursi golaha deegaanka ah.[75] Shaqaalahaas hore ee shaqaalaha rayidka ah wuxuu ku guuleystay kursi golaha deegaanka ah, kadib hal bil oo aan wax lacag ah la siin, waxa uu ka tagay booska golaha deegaanka .[76] Ninkan waxa uu shaqadiisii joogtada ahayd ee dowladda federaalka ku waayay male-awaal aan dhab ahayn. Isaga kaliya kama tagin golaha deegaanka degmada Cadaado. Labo xubin gole oo kale ayaa lacag ku bixiyay sidii ay kuraas uga heli lahaayeen golaha deegaanka Cadaado, balse waa ay isaga tageen golaha kadib markii ay ogaadeen in golaha deegaanka aanu ahayn sidii ay ka aaminsanaayeen.[77]

Xubin katirsan golaha deegaanka ee (Koonfurta) Galkacyo ayaa ka dhawaajiyay waxyaalaha kor u qaaday filashada ay qaar ka qabeen in goleyaasha deegaanka ay ka helayaan mushaar fiican. Warark qaar ayaa sheegayay in magaalada Gaalkacyo laga hadal hayay warar sheegaya

74 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Cadaado 26 Luulyo 2023.

75 Ibid.

76 Ibid.

77 Ibid.

in xubnaha golaha deegaanka ay lacag dhan USD 700 bishiiba qaadan doonaan.[78] Arrin kale ayaa ahayd in dadka qaar ay filanayeen in hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ay mashaariic soo raacayaan, waxaana loo maleynayay in ay tahay fursad ay dhaqaale uga helayaan maadaama ay iyaga (xubnaha goleyaasha) noqonayaan jilayaal muhiim ah oo kamid noqon doona mashaariicdan.[79]

Aragtidan khaldan ayaa dhiirageliyay damaca dad badan oo aan u qalmin in ay xubno gole noqdaan. Tani waxay horseedday in la dhiso goleyaal degmo oo ay ka buuxaan xubno aan buuxin shuruudaha ugu hooseeya ee lagu aqbali karo xubinnimada goleyaasha deegaanka iyadoo qaar badan oo kamid ah ka-qeybgaleyaasha dood-kooxeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada ay marar badan arinkaas ka cawdeen.

## 7.4 Hardanka awoodeed ee u dhexeeya maayarrada iyo xubnaha goleyaasha deegaanka

Xogta lagasoo uruuriyay goobaha daraasadda laga sameeyay ayaa muujinaya in maayarrada iyo xubnaha golaha deegaanka uu ka dhex jiro khilaaf joogto ah, taasoo sii wiiqday goleyaasha deegaanka kana hor istaagtay gudashada waajibaadkooda. Isha ugu weyn ee khilaafkooda ayaa lagu sababeeyay in maayarrada, maayarro ku xigeennada iyo xog-hayeyaasha ay awoodaha dowladda hoose heystaan. Maayarrada ayaa lagu eedeeyay in ay si goonni u ah u maamulaan howlaha degmada iyagoo aan la shaqeyn xubnaha golaha deegaanka.

Khilaafkan ayaa inta badan ku saabsan dhaqaalaha yar ee degmooyinka soo xareeyaan; iyo gargaarka bini-aadannimo; gaar ahaan lacagaha loogu caawiyo dadka tabaaleysan ee degmada ku nool. Maayarrada ayaa la sheegay in ay go'aan ka gaaraan lacagta la bixinayo iyo cidda la siinayo halka ilo wareedyo ay sheegeen in xubnaha golaha deegaanka aanay talo ku laheyn go'aannadaas. Dad xog-ogaal ah ayaa cilmibaarayaasha u sheegay in lacagaha laga qeybiyo degmooyinka ay yihiin isha ugu muhiimsan oo ay xubnaha goleyaasha deegaanka ku xisaabtamaan in ay xoogaa lacago ah ka helaan si ay ugu daboolaan nolosha reerahooda maadaama aysan haysan ilo kale oo dhaqaale. Marka, ka reebidda maamulidda dhaqaalaha yar ayaa ka caraysiisay xubnaha golaha, waxa ayna labada dhinac dhex dhigtay khilaaf. Waa xaqiiq laga walwalo in musuqa iyo maamulka gargaarka bini-aadannimo ay ilo dakhli oo aasaasi ah u tahay maayarrada iyo xubnaha goleyaasha degmooyinka ee Soomaaliya. Hay'adaha gargaarka bini'aadannimo ayaa la sheegay inay og yihiin arrintan, balse waxaa jira dadaallo liita oo lagu horumarinayo daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka gargaarka bini-aadannimo ee Soomaaliya ee ka yimaada hay'adaha samafalka iyo deeq-bixiyeyaashooda, ama madaxda Soomaaliya.

Intaa waxaa dheer, oo la xiriira khilaafka ka dhasha dhaqaalaha, xog-ogaal laga wareystay Wasaaradda Arrimaha Gudaha Galmudug, ayaa cilmibaarayaasha u sheegay in xubnaha golaha ay inta badan dalbadaan xubin ka noqoshada guddiga maaliyadda ee golaha deegaanka, halka ay iska diidaan xubinnimada guddiyada kale sida guddiga anshaxa, iyo guddiga habraaca iyo xeer-hoosaadka golaha deegaanka.[80]

78 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Galkacyo (koonfur), 22 Luulyo 2023.

79 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Galkacyo (koonfur), 22 Luulyo 2023.

80 Wareysi lala yeeshay mas'uul ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Galmudug, Dhuusamareeb, 30 Luulyo 2023.

Marka lagasoo tago dhaqaalaha, khilaafka u dhexeeya labada dhinac ayaa sidoo kale loo aaneynayaa in ay sabab u tahay maayarrada oo aan isla xisaabtan ka oggoleyn xubnaha golaha una dhaqma sidii iyaga oo ku shaqeeya marxaladdii aanay goleyaasha deegaanka dhisneyn. Waxaa sidoo kale lagu eedeeyaa inay ku xiran yihiin madaxda dowlad-goboleedyada. Intaa waxaa dheer, khilaafka sii socda ayaa sidoo kale la aaminsanyahay in uu keenayo in aan si cad loo kala xaddidin doorarka ay kala leeyihiin saraakiisha dowladaha hoose; xubnaha golaha deegaanka, iyo madaxda dowladaha hoose oo isugu jira maayarka, maayar ku xigeenka, iyo xog-hayaha.[81] Isku dhacan soo noqnoqda ee u dhexeeya maayarrada iyo xubnaha golaha deegaanka ayaa ka jira dhammaan dowlad-goboleedyada, waxa uuna curyaaminayaa waxqabadkii la filayey ee goleyaasha deegaanka. Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada ayay cabashooyin ka soo gaartaa dhinacyada is khilaafsan waxa ayna isku dayaan in ay dejiyaan dadka cabanayo, balse tani waxay sababtaa xil-ka-qaadista maayarro, sida ka dhacday degmada Baraawe, ama kala dirista golaha deegaanka sida ka dhacday Diinsoor.

## 7.5 Khilaaf beelleedyada miyiga

Dagaal beeleedyada miyiga ka jira ee kusoo noqnoqday deegaannada Galmudug iyo Hirshabeelle ayaa la sheegay in ay saameyn ku leeyihiin waxqabadka goleyaasha deegaanka. Maayar ka tirsan Galmudug ayaa ka sheekeeyay sida colaad beeleedyada u dhexeeya beelaha/jufooyinka deriska ah ee ka kala tirsan dowladaha hoose ay uga carqaladeeyaan dowladaha hoose gudashada waajibaadkooda. Waxa ay xubnaha golaha deegaanka ku qasbeysaa in ay si degdeg ah u aadaan goobaha colaaddu ka taagan tahay si ay xiisadda u qaboojiyaan oo ay joojiyaan daadinta dhiigga si loo suurageliyo marxaladda xigta ee xallinta khilaafka.[82] Howshan waxa ay u baahan tahay in dowladaha hoose ay u qoondeeyaan waqti, iyo dhaqaale ay ku daboolaan kharashaadka saadka ee ku baxaya in Muqdisho looga yeero odayaasha saameynta leh oo muhiim u ah dhexdhexaadinta dhinacyada dagaalamaya, iyo sidoo kale kharashaadka kale ee ku baxaya xalinta khilaafka.[83]

## 7.6 Dakhli la'aan

Ka sokow arrimaha iyo xaaladaha kale ee cuuriyaamiyay waxqabadka goleyaasha deegaanka, dakhli la'aanta goleyaasha deegaanka la dhisay ayaa weli caqabad weyn ku ah waxqabadkooda. Xaaladdan ayaa fasiraad u noqon karta marka la sharraxayo sababta ay goleyaasha deegaanka ugu shaqeyn la' yihiin dadka deegaanka. Masuuliyiin ka tirsan dowladaha hoose oo daraasaddan lagu wareystay ayaa caddeeyey in aanay wax dakhli ah uruurinin ama aysan dadka deegaanka ka qaadin wax canshuur ah oo xataa aanay dabooli karin kharashaadka howl-maalmeedka ee degmooyinka.

Degmooyinku waxay la il-daran yihiin arrimo isbiirsaday oo xaddidaya awooddooda dakhli-uruurin. Marka hore, inta badan degmooyinka waa kuwo ku yaalla goobo durugsan oo aan laheyn dhaqdhaqaaq dhaqaale oo ay dowladda hoose canshuur ka qaadi karto. Degmooyin kalena waa kuwo la go'doomiyay, sida kuwa ku yaalla dowlad-goboleedka Koonfur-galbeed

81 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Cadaado, 27 Luulyo 2023.

82 Wareysi lala yeeshay duq magaalo, Galmudug, 27 Luulyo 2023.

83 Ibid.

halkaasoo aanay canshuurtu xilligan aheyn muhiim.

Midda labaad, dhowr degmo oo kaliya sida (koonfurta) Gaalkacyo oo ah xarunta gobolka koonfurta Mudug iyo Guriceel oo ku taalla Galmudug ayaa leh awood dakhli uruurin. Sikastaba ha ahaatee, degmooyinkan ayaan weli si buuxda u uruurin cashuuraha iyagoo caqabado sharci iyo kuwo aqbalaad bulsho ah wajahaya. Dowladaha hoose ee degmooyinka Galmudug oo xogta lagasoo uruuriyay ayaa cabasho ka muujiyay saameynta ay yeelatay aragtida khaldan ee bulshada ee ku aaddan canshuur-qaadista. Xubin gole oo ka tirsan golaha deegaanka (koonfurta) Gaalkacyo ayaa sheegay in bilihii ugu horreeyay ee dowladda hoose ee Gaalkacyo ay awoodi waayeen in ay shaqaaleysiiyaan canshuur qaadayaal, maadaama bulshadu ay aaminsanayd in dadka ku howlan canshuur qaadista ay yihiin kuwo dambi ku jira.[84] Balse waxaa la sameeyay olole wacyigelin ah si loo xalliyo caqabadahaas, waxaana guulo kooban laga gaaray dhinacan, ayuu hadalkiisa ku daray.

Fahamkan dadweynaha waxa uu qeyb ahaan salka ku hayaa fasirka khaldan ee diinta Islaamka mararka qaar laga sameeyo, iyo qeyb ahaan maamul la'aan iyo/ama maamul xumo tobaneeyo sano jirtay. Xubin ka tirsan golaha deegaanka ee degmada Cadaado ayaa ka hadlay arrin la mid ah middii xubinta gole ee hore ee Gaalkacyo, waxa uuna intaa ku daray in qaar kamid ah culumaa'udiinka ay uga digaan dadka deegaanka bixinta canshuurta iyagoo ku sheegaya in ay tahay "dambi" sidaas darteedna qofkii bixiyo uu ku kacayo fal dambiyeed.[85]

Midda saddexaad, ganacsatada oo ah daneeyayaal muhiim u ah in dowladaha hoose ay ka soo baxaan waajibaadkooda shaqo ayaa lagu eedeeyay inay ka horjoogsadeen dowladaha hoose inay mudnaanta siiyaan uruurinta canshuuraha. Ganacsatada ayaa lagu eedeeyay in ay miyiga colaado ka abuuraan iyagoo isticmaalaya maleeshiyo beeleed si ay dowladda hoose uga leexiyaan canshuur uruurinta ayna muhiimadda u saaraan xallinta colaadaha beelaha soo laalaabanaya.[86]

Ugu dambeyntii, arrinta kale oo muhiimka ah oo hortaagan waxqabadka goleyaasha deegaanka ee dakhli-uruurinta la xiriirta ayaa ah in awoodaha maaliyadeed ay gacanta ku hayaan wasaaradaha maaliyadda ee dowlad-goboleedyada. Wasaaradaha Maaliyadda ee dowlad-goboleedyada ayaa uruuriya canshuuraha, iyagoo aan wax dakhli guda ah la wadaagin dowladaha hoose. Arrinkan waxaa lagusii sharraxay qeybta hoose.

## 7.7 La'aanta iyo/ama yaraanta xafiisyo iyo alaabyo xafiis

Shuruud aasaasi u ah goleyaasha deegaanka iyo waxqabadka dowladaha hoose waa heysashada goobo xafiis iyo alaab xafiis si ay uga caawiso qabsashada howl-maalmeedkooda caadiga ah. Daraasaddan waxaa lagu ogaaday in degmooyinku aysan lahayn xafiisyo ay xubnaha golaha deegaanka iyo madaxda dowladaha hoose iyo waaxyaha ku shaqeeyaan ama ay leeyihiin xafiisyo kooban oo aan lahayn agab xafiis oo ku filan. Mas'uuliyiin ka tirsan dowladda hoose ee Gaalkacyo oo daraasaddan lagu wareystay ayaa sheegay in hay'adihii gacanta ka geystay dhismaha golaha deegaanka ay u qalabeyeen qol ay ku shiraan xubnaha golaha deegaanka

84 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Galkacyo (koonfur), 22 Luulyo 2023.

85 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Cadaado, 26 Luulyo 2023.

86 Ibid.

ee degmada (Koonfurta) Gaalkacyo oo ku dhex yaalla xarunta dowladda hoose oo leh miiska shirarka iyo kuraas caag ah. Sikastaba ha ahaatee, ma aysan qalabeyn xafiisyadii kale ee muhiimka u ahaa howlaha dowladda hoose.[87] Guddoomiye ku xigeenka katirsan Galmudug ayaa sheegay in uu isagu iibsaday agabka xafiiskiisa. Sidoo kale, masuuliyiinta dowladda hoose ayaa ka cabanayay duruufaha dhismayaasha degmooyinka ay ka tirsan yihiin oo ah kuwo duugoobay oo burbursan oo aan ahayn kuwo jawi shaqo ku habboon.

## 7.8 Amni-darro

Amni-darrada ayaa khatar ku ah heer walba oo dowladnimada ah, waxa ayna khatar weyn ku tahay guud ahaan dalka, xasilloonida siyaasadeed, horumarka dhaqaale ee suuragalka ah, iyo badqabka dadka. Sikastaba ha ahaatee, dowladaha hoose ayaa si gaar ah ugu nugul amni-darrada ka imaaneysa beelaha ama jufooyinka dhexdooda iyo maleeshiyada, iyagoo aan haysan agabkii lagama maarmaanka u ahaa hagaajinta amniga.

Nabadgelyo-xumada ayaa si weyn u saameysay – welina saameyneysa – goleyaasha deegaanka ee dowlad-goboleedka Koonfur-galbeed, waxa ayna qeyb ahaan noqdeen kuwo aan shaqeynayn. Sababtuna waxay tahay in degmooyinka leh gole deegaan ay go'doomiyeen oo ay sanado badan kala gooyeen al-Shabaab oo ka taliya deegaannada iyo tuulooyinka hoos yimaada degmooyinkaas. Sida ay sheegeen ka qeybgalayaasha dood-kooxeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada ee Baydhabo ku sugnaa, xubnaha golaha deegaanka ee deegaannadaas ayaan awood u laheyn inay la macaamilaan goobaha lagasoo doortay ee tuulooyinka ay ku metelaan goleyaasha deegaanka. Intaa waxaa dheer, tani waxay cabsi gelisay dadka deegaanka inay la shaqeeyaan goleyaasha deegaanka maadaama ay ka baqayaan ciqaabta al-Shabaab. Sidoo kale, xaaladaha amni-darro ee jira ayaa u diiday dowladaha hoose in ay uruuriyaan canshuur.

Amni-darada ayaa saameysay goleyaasha deegaanka ee Galmudug iyo Hirshabeelle balse waxa ay u saameysay si ka duwan Koonfur-galbeed. Nabadgelyo-darrada maamulladan waxay inta badan ka timaadaa soo noqnoqoshada khilaafyada beelaha/jufooyinka dhexdooda/gudahooda ee la xiriira kheyraadka biyaha iyo daaqa; dhaca xoolaha; iyo dilal aargoosi ah oo astaan u ah dowlad-goboleedyadan. Nabadgelyo-xumada noocan ahi waxay culeys weyn ku haysaa dowladaha hoose, iyadoo colaadaha beelaha ee soo noqnoqda ay hay'adahaasi ka weeciyaan gudashada waajibaadkooda, taas beddelkeedana ay ku qasbaan inay wax ka qabtaan dhibaatooyinka ka dhalanaya colaadahaas.

Waxaa intaa dheer, duullaanka ka dhanka ah al-Shabaab ee ka socda Galmudug iyo Hirshabeelle ayaa maamullada degmooyinka culeys saaray. Dowladaha hoose ayaa taakuleyn uga gacan geysta dagaallada ka dhaca deegaannada ay ehelladooda ku nool yihiin. Tusaale ahaan, xubin gole oo kasoo jeeda (Koonfurta) Galkacyo ayaa sharraxay in markii al-Shabaab ay weerartay degmada Wisil ee gobolka Mudug, 2021-kii, ay joogsadeen howlihii ay wadday dowladda hoose ee Gaalkacayo, waxaana ay diiradda saartay dagaalka.[88] Waxa uu intaasi ku daray in muddadaas canshuurta yar ee degmada lagasoo uruuriyey looga qeyb qaatay dagaalka, iyadoo diyaarad lagu daabulay macawisleydii dhaawacantay, iyo ciidamada Daraawiishta Galmudug

87 Wareysi xildhibaan katirsan degmada Galkacyo (koonfur), 21 Luulyo 2023.

88 Wareysi lala yeeshay xildhibaan katirsan degmada Galkacyo (koonfur), 22 Luulyo 2023.

oo inta badan kasoo ambabaxay magaalada Gaalkacyo, lana geeyey isbitaallo, sidoo kalena raashin loogu iibiyey iyo in xitaa baabuurta dagaalka lagu dayactiray.

## 7.9 La'aanta maamul daadejin iyo taageero maaliyadeed

Dhammaan caqabadaha kor ku xusan ee ku wajahan waxqabadka goleyaasha deegaanka, u daadejin la'aanta awoodaha maaliyadeed iyo adeeg bixinta dowladaha hoose ayaa ah caqabadaha ugu waaweyn ee wiiqaya shaqeynta goleyaasha deegaanka. Waxaa ka hadlay ka qeybgale kasta ee dood kooxeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada ee dhammaan goobaha xog uruurinta aan ka sameynay.

Dowlad-goboleedyada waxay sameeyeen goleyaal deegaan iyagoo aan siinin awood ay ku uruuriyaan canshuurta ama ay ku maamulaan adeeg bixinta. Taas beddelkeeda, dowlad-goboleedyada ayaa sii heysta awoodahaas, waxayna ku uruursan yihiin magaallo madaxda dowlad-gobleedka. Tani waxa ay gooni u soocday hay'adihii la dhisay iyadoo ka dhigtay kuwo aan waxba gelin maadaama dowladda hoose aanay waxba u heyn bulshada.

Arrinka walaaca badan ayaa ah in dowlad-goboleedyada aysan wax taageero maaliyadeed ah siinin dowladahooda hoose ha ahaato canshuuraha ay uruuriyaan iyo deeqaha ay ka helaan dowladda federaalka. Xaaladdani waxay waafaqsan tahay natiijada daraasad ay sameysay Somali Public Agenda oo la daabacay 2022-kii (Yusuf, 2023)

Sikastaba ha ahaatee, caqabadaha loo aaneynayo shaqeyn la'aanta ka muuqato goleyaasha deegaanka ee dowlad-goboleedyada daraasadda laga sameeyay kuma koobna dhibaatooyinka kor ku xusan. Arrimo kale ayaa hor taagan shaqeynta goleyaasha deegaanka. Waxaa kamid ah waxqabadka maamul ee maayarrada oo xaddidan; iyo la'aanta dhaqaalihii lagu taageeri lahaa shaqeynta goleyaasha deegaanka oo ka imaaneysa hay'adaha deeqbixiyeyaasha taageeray dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka.

Sii socoshada caqabadaha wiiqaya waxqabadka goleyaasha deegaanka, iyo dadaal la'aanta dowlad-goboleedyada ee hormarinta goleyaasha deegaanka waxay markhaati u tahay mudnaanta hooseysa oo ay goleyaasha deegaanka kaga jiraan mudnaanta dowlad-goboleedyada. Intaa waxaa dheer, tani waxay taageerada mustaqbalka ee deeq-bixiyeyaasha ee hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka ka haray dowlad-goboleedyada ka dhigi doontaa mid aan macquul ahayn oo aan la sameyn karin maadaama dadaalladii hore aysan keenin natiijooyin wanaagsan ama dhiirigelin muujineysa ballaarinta tijaabada dhismaha goleyaasha deegaanka.

# 8.0 Caqabadaha heysta dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka waaweyn ee Hirshabeelle, Koonfur-galbeed & Galmudug

Ilaa hadda, wadarta guud ee goleyaasha deegaan ee laga dhisay saddexda dowlad-goboleed waa 14 – 7 Galmudug ah, 6 Koonfur Galbeed ah, iyo 2 Hirshabeelle ah. 14-ka degmo ee goleyaasha deegaan leh waa tiro kooban marka loo eego wadarta tirada degmooyinka hoos yimaada dowlad-goboleedyadan. Sikastaba ha ahaatee, arrintaan waxay si gaar ah u khuseysaa Koonfur-galbeed iyo Hirshabeelle oo leh magaalooyinka ugu badan ee laga dhisi karo goleyaal deegaan balse aanan weli laga dhisin.

18-ka degmo ee Koonfur-galbeed, waxaa gole deegaan loo sameeyay 6 degmo; afar degmo waxaa gacanta ku haya al-Shabaab, halka 8-da degmo ee soo hartay ay u badan yihiin magaalooyin muhiim ah, balse waxaa maamula masuuliyiin uu si kumeelgaar ah u magacaabay dowlad-goboleedka Koonfur-Galbeed. Sidoo kale, Hirshabeelle, keliya Jowhar iyo Warsheekh ayaa leh goleyaal deegaan, halka degmooyinka kale ee waaweyn ay maamulaan maamullo kumeelgaar ah ee uu dowlad-goboleedku magacaabay, sida Beledweyne, Buula Barde, iyo Balcad.

Taa caksigeeda, magaalada keliya ee Galmudug ka tirsan oo aan gole deegaan loo sameyn waa magaalada Hobyo, waxaana dhawaan soo raacay Xarar Dheere, oo dabayaaqadii 2022-kii laga soo saaray al-Shabaab kadib sanado badan oo ay kooxdu maamuleysay. Qeybtan waxa ay gorfeyneysaa caqabadaha hor istaagay dhismaha goleyaasha deegaanka ee magaalooyinka waaweyn ee ka tirsan Koonfur-galbeed, Galmudug, iyo Hirshabeelle.

## 8.1 Loollan awood qeybsi ee magaalooyinka ay degaan beelo kala duwan

Degmooyinka laga sameeyay goleyaasha deegaanka waxaa dega hal qabiil ama hal beel ayaa ku badan iyo beelo yar yar oo la dega. Sikastaba ha ahaatee, awood qeybsiga ayaa ahayd marxaladda ugu dhibka badan ee geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ee laga hirgeliyay dowlad-goboleedyada. Waxay dib-u-dhac ku keentay jadwalladii loo dejiyay in lagu dhameystiro hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka, iyadoo qaadatay waqtiga ugu badan. Muranka ka dhashay saami-qeybsiga kuraasta golaha deegaanka ayaa u dhexeeyay beelaha/jufooyinka dega degmooyinkaas, iyaga ayaana dhexdooda ku heshiiyay.

Sikastaba ha ahaatee, awood-qeybsiga degmooyinka ay deggan yihiin beelaha kala duwan ayaa lagu tilmaamay inay tahay caqabadda hortaagan billaabidda hannaanka. Beelaha qaar ayaa sheeganaya inay yihiin tirada ugu badan ee deggan magaaloooyinka iyagoo ku dadaalaya helitaanka kuraasta ugu badan ee golaha deegaanka ee la dhisi doono. Ma ahan oo keliya in ay rabaan kuraasta ugu badan balse waxa ay doonayaan in inta aanu hannaanku billaaban loo damaanad qaado in maayarradu ka imaanayaan beeshooda. Waxa kale oo dhibka sii kordhiyay waa isbeddelka tirada dadka tan iyo markii ay bilowdeen dagaalladii sokeeye ee Soomaaliya. Beelaha qaarkood oo loo arkayay in ay ku tiro badan yihiin magaalooyin gaar ah ayaa hadda waxaa ka batay beelihii/jufooyinkii cusbaa ee u guuray goobahaas.

Oday dhaqameed reer Baydhabo ah ayaa ku dooday in intii u dhexeysay 1960-1990-kii, 6 beelood loo aqoonsanaa inay yihiin beelaha ugu badan ee leh awood qeybsiga degmada Baydhabo. Sikastaba ha ahaatee, wixii markaas ka dambeeyay waxaa soo baxay beelo cusub oo xitaa noqday kuwo ka awood badan dhanka tirakoobka marka loo eego qabiilada aaminsan inay iyagu leeyihiin magaalada.[89]

Muranka ka taagan saami qeybsiga kuraasta golaha deegaanka ayaa laga arkaa magaalooyinka waaweyn. Waxa uu ama sababay hakinta geedi-socodka dhismaha golaha deegaanka ama dib-u-dhac ayuu ku keenay. Tusaale ahaan, Dowlad-goboleedka Koonfur-galbeed ayaa 15-kii July 2019-kii degmada Ceel-Barde ee gobolka Bakool ka billaabay geeddi-socodka dhismaha golaha deegaanka, balse waxaa ku yimid hakad, kadib markii ay is-hor-taag ku sameeyeen beelaha/jufooyinka waaweyn ee ku nool degmadaas, kuwaasoo ku adkeystay inay helaan aqlabiyadda kuraasta golaha deegaanka si ay ugu sahasho inay helaan codadka doorashada duqa magaalada ee isla beesha/jufada. Sidaas si lamid ah, geeddi-socodkii dhismaha golaha deegaanka ayaa bishii Diseembar 2017-kii laga bilaabay degmada Baydhabo balse muran ka dhashay awood-qeybsiga beelaha ayaa howsha loo hakiyay.

Intaa waxaa dheer, maamulka Galmudug ayaa dib u dhigay dhismaha golaha deegaanka ee Hobyo kadib markii ay jufooyinka Habar-gidir ee Saleebaan iyo Sacad isku khilaafeen awood qeybsiga. Hirshabeelle ayaa sii wadi weysay dhismaha golaha deegaanka ee Buula Barde, kadib markii beelaha dega degmadaasi ay isku khilaafeen awood qeybsiga.

Bilaabidda hannaanka ee magaalooyinka kale ee waaweyn ayaa adkaatay muranka xooggan ee ka taagan qeybsiga kuraasta golaha deegaanka awgeed. Dowlad-goboleedyada ayaa la sheegay in ay dib u dhigeen hannaanka si looga fogaado colaad ka dhalan karta arrintan.

## 8.2 Colaadaha aan la xallin

Bulshada ku nool magaalooyinka ay beelaha kala duwan deggan yihiin ee aan gole deegaan laheyn ayaa leh taariikh colaad beeleedyo iyo cadaawad aan la xallin. Tani waxay xumeysay xiriirka ka dhexeeya beelaha. Jiritaanka xaaladdan ayaa adkeysay isku dayga lagu doonayo in lagu billaabo geeddi-socodka dhismaha golaha deegaanka ee degmooyinkan. Beelahan ayaa kala qaba tabashooyin, mana isugu imaan karaan wadahadal dhab ah oo ku saabsan geeddi-socodka dhismaha gole deegaan, maadaama xusuusaha colaadda ay weli cusub tahay. Duruufahaan ayaa ka jira degmooyin ay beelaha kala duwan degaan oo ka tirsan gobolka Hiiraan ee Hirshabeelle iyo gobolka Shabeellaha Hoose ee Koonfur-galbeed.

Sikastaba ha ahaatee, arrinkan ayaa kusii badan degmooyinka ku yaalla gobolka Shabeellada Hoose, halkaasoo ay ka jiraan tabashooyin u dhexeeya beelaha asal ahaan degganaa iyo beelaha goobahaas degay kadib burburkii dowladdii dhexe 1991-kii. Xiriirka ka dhexeeya beelahan ayaa ah mid aan sahlanayn. Ka qeyb galayaasha wareysi xog-ogaaleedyada iyo dood-kooxeedyada Koonfur-galbeed ayaa tilmaamay in beelaha kasoo jeeda degmooyinka aan laheyn gole deegaan ee gobolka Shabeellada Hoose aysan aqoonsaneyn xuquuqda metelaadda beelaha aan asal ahaan kasoo jeedin ee kamid noqon kara golaha deegaanka, halka kuwa gadaal ka

89 Wareysi lala yeeshay oday dhaqameed, Baydhabo, 23 November 2023.

yimid ay doonayaan in ay helaan saami ku filan ee kuraasta golaha deegaanka ee la sameynayo sababtoo ah in ay deegaan yihiin iyo dhulka ay muddo sanado ah halkaas ku lahaayeen. Xaaladdan waxay muujineysaa in beeluhu aysan diyaar u ahayn in ay ka doodaan dhismaha gole deegaan oo ay qeyb ka yihiin dhammaan dhinacyada, taasoo ay ugu wacan tahay xiriirka qaraar iyo tabashooyinka ka dhexeeya beelaha. Sidoo kale, qaar ayaa ku dooday in maamulka Koonfur-galbeed uu ka gaabiyay billaabidda geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ee deegaannadaas, isagoo tixgelinaya cawaaqib-xumada ay arrintan keeni karto, iyadoo la filayo in arrinkan uu soo jiito jilayaal ka baxsan maamulka oo taageeraya beelaha loo arko inay yihiin kuwo "ku cusub" degmooyinkaas.

Iyadoo ay jirto jawigan colaadeed, in loo gudbo marxaladda dhismaha goleyaasha deegaanka iyadoo aan laga hadlin colaadihii beelaha ee soo jiray tobaneeyo sano waxa ay keliya kicineysaa dareenka dadka, horseedeyaa isku-dhacyo, waxayna ugu dambeyn sababeysaa ku guuldareysiga dhismaha golaha deegaanka. Iskuday kasta oo mustaqbalka gole deegaan loogu dhisayo degmooyinkan, waa in ugu horreyn loo abuuraa xaallado wanaagsan waana in la tixgeliyaa in si taxadar leh loola tacaamulo xaaladahan.

## 8.3 Heshiis siyaasadeed oo aan jirin

Dhammaan dowlad-goboleedyada waxaa lagu sameeyay hannaan la isku haystay oo daneeyayaasha ay khusayso aanay isku raacsaneyn. Tani waxay keentay cawaaqib xumo dhibaato ku heysa maamullada la sameeyay. Geedi-socodka degdegga ahaa awgeed, xiriirka ka dhexeeya jilayaasha dowlad-goboleed kasta ayaa ah mid cakiran. Tani waxay curyaamisay dadaalkii lagu dhisi lahaa dowlado hoose. Sikastaba ha ahaatee, dowlad-goboleedyada lagu dhisay hannaankan ayaanan ku guuleysan inay xalliyaan tabashooyinkii ka dhashay dhismaha dowlad-goboleedka.

Dadkii aan ku wareysannay daraasadsan ee ku sugnaa Hirshabeelle ayaa sheegay in heshiis siyaasadeed la'aanta ay hakisay geeddi-socodkii dhismaha goleyaasha deegaanka ee magaalooyinka. Dadka qaar ayaa ku dooday in maamulku uu kala qeybsan yahay, islamarkaana aanu maamulin degmooyinka gobolka Hiiraan sababtuna waa in qaar kamid ah dadka deegaanka ay ku doodayaan in aanay ku qanacsaneyn awood-qeybsiga.

## 8.4 Rabitaan siyaasadeed oo aan jirin

Rabitaan siyaasadeed oo aan jirin ayaa caqabad ku noqotay in goleyaal deegaan laga dhiso magaalooyinka waaweyn ee Hirshabeelle sida ay caddeeyeen ka qeybgaleyaashii wareysi xog-ogaaleedyada iyo dood kooxeedyada ee Hirshabeelle ku sugnaa. Qaar kamid ah jilayaasha oo isugu jira hoggaanka maamulka, maamullada gobollada, iyo kuwa degmooyinka ayaa la arkaa in ay dhiiragelinayaan xaaladda jirta iyadoo u jeedku yahay in ay iyaga maamushaan canshuuraha kooban ee laga uruuriyo deegaannadaas. Jilayaashan ayaa dhismaha gole deegaan uga walaacsan in uu ka weeciyo ilaha dhaqaale oo ay maamulaan iyagoo ka fikiraya in golaha deegaanka cusub uu kaalintaas qaadanayo.

## 8.5 Dhaqaale la'aan

Iyadoo ay jiraan arrimaha aan kor kusoo xusnay ee hortaagan dhismaha goleyaasha deegaanka ee magaalooyinka waaweyn, dhaqaale la'aanta degmooyinka cusub ayaa la ogaaday inay tahay arrin kale oo caqabad ku ah dhismaha goleyaasha deegaanka ee magaalooyinka waaweyn. Sida kor u xusan, dowlad-goboleedyadu ma lahan miisaaniyad u qoondeysan hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka waxa ayna ku tiirsanaayeen deeqo uga imaanayey hay'adaha taageera dhismaha goleyaasha deegaanka ee dowlad-goboleedyada. Sikastaba ha ahaatee, waxa ay u badan tahay in hay'adaha aanay dhaqaale cusub u hayn dhismaha gole deegaan cusub maadaama hay'adahan ay su'aalo ka keenayaan waxqabadka goleyaashii deegaan oo ay sameyntooda gacanta ka geysteen.[90]

## 8.6 Amni-darro

Amni-darrada ayaa halis ku ah hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka goleyaal deegaan laga sameeyay ee Hirshabeelle iyo Koonfur-galbeed. Waxa ay weli khatar ku tahay shaqeynta iyo in gole deegaan laga dhiso magaalooyinka waaweyn ee Hirshabeelle iyo Koonfur-galbeed. Jawaab-bixiyaasha dood-kooxeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada ayaa sheegay in qaar kamid ah odayaasha beelaha oo ah daneeyayaal muhiim u ah hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee magaalooyinka aanay ka qeyb qaadan karin hannaanka sababtuna ay tahay in ay ku noolyihiin tuulooyinka ay al-Shabaab ka taliyaan ama in ay ku noolyihiin magaalooyinka balse ay dareemayaan in haddii ay howshaas ka qeybgalaan ay dhibaato kooxda kala kulmayaan.

Mas'uul ka tirsan maamulka gobolka Hiiraan oo ka hadlayay khatarta ay amni-darrada ku yaalan karto hannaanka dhismaha golaha deegaanka ee magaalada Beledweyne ayaa yiri.

*"Waxaa nagu adkeyd in aan isku keenno odayaasha beelaha oo aan xitaa ka wada hadalno arrimaha ugu yar, sababtoo ah waxaa u hanjabay al-Shabaab. Xitaa haddii ay degmooyinkaas qaarkood aysan Al-Shabaab ka talin, haddana odayaasha qabiilku kuma dhiiran karaan inay nagala hadlaan arrimahan oo kale, waayo si fudud ayaa loo beegsan karaa."*[91]

Inkastoo ciidamada dowladda federaalka iyo Macawiisley ay ku guulaysteen inay dhul badan ka qabsadaan kooxda, haddana weli lama joojin khatartii al-Shabaab ee deegaannadii horey looga qabsaday, waana arrin muhiim u ah dadka ay khuseyso geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka.

90 Wareysi lala yeeshay xog-ogaal da' yar, Baydhabo, 22 Oktoobar 2023.

91 Wareysi lala yeeshay mas'uul ka tirsan maamulka degmada Beled Weyne, Beled Weyne, 10ka Luulyo 2023.

## 9.0 Gunaanad

Inkastoo dowlad-goboleedyada laftoodu ay ku aas-aasmeen hannaan deg-deg ah oo bulshada kor uga yimid oo aan wadatashi iyo isafgarad lala sameyn daneeyeyaasha ay khuseyso, iyadoo sidoo kale laga yimid tobaneeyo sano oo colaado, maamul la'aan iyo kalsooni darro ah, ayay waxa ay sanado kooban kadib dhismahoodii billaabeen dhismaha heerka saddexaad – goleyaasha degmoooyinka – ee nidaamka federaalka. Ilaa iyo hadda, saddexda dowlad-goboleed ee kala ah Galmudug, Koonfur-galbeed, iyo Hirshabeelle waxay dhiseen 7, 6, iyo 2 gole deegaan sida ay u kala horreeyaan, wadartooduna ay tahay 15. Tani waa keliya qeyb kamid ah tirada guud ee degmooyinka ka tirsan dowlad-goboleedyadan, iyagoo iskugu jira degmooyinkii ka horreeyay 1991-kii iyo degmooyin cusub ee la sameeyay 1991 kadib.

Duruufaha ka dhashay hannaankii lagu sameeyay dowlad-goboleedyada iyo tobannaan sano oo colaad beeleedyo socdeen ayaa saameeyay dhismaha goleyaasha deegaanka ee dowlad-goboleed kasta. Geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka waxa uu ahaa howl adag, waxa uuna la kulmay caqabado waaweyn oo khatar ku ahaa hirgelinta geeddi-socodka, waxa uuna ka qeybqaadanayaa caqabadaha maamul oo ay wajahayaan magaalooyinka aan weli laga hirgelin, gaar ahaan magaalooyinka waaweyn ee dowlad-goboleedyada. Waxaa xusid mudan, dadka deegaanka waxay rajo ka qabeen goleyaasha deegaanka cusub. Nasiib darro, rajadaas ayaa burburtay wax yar kadib markii ay goleyaashii deegaan noqdeen kuwo aan shaqeyneyn, taasoo ay ugu wacan tahay caqabado badan oo weli taagan. Xaaladdani waxay u baahan tahay dadaallo ay sameeyaan masuuliyiinta ay khuseyso, si wax looga qabto arrimaha salka ku haya shaqeyn la'aanta dowladaha hoose iyo in loo oggolaado in ay gutaan mas'uuliyadda loo idmaday.

## 10.0 Talooyin

Si loo xalliyo arrimaha tirada badan ee caqabadda ku ah dhismaha goleyaasha deegaanka, sidoo kalena goleyaasha deegaanka loogu suurageliyo in ay shaqeeyaan, daraasaddan ayaa soo bandhigeysaa talooyin tixgelin mudan.

1. In aan la dedejinin hannaanka, loona diyaar garoobo dhismaha goleyaasha deegaanka: Geedi-socodyadii dhismaha goleyaasha deegaanka ee laga hirgeliyay dowlad-goboleedyada waa la dedejiyay waxaana kasoo baxay natiijooyin hooseeya. Geedi-socodkan degdegga ah waxaa loo aaneynayaa caqabado badan oo salka ku haya shaqeyn la'aanta goleyaasha deegaanka. Si looga fogaado in cillado noocaan ah ay degmooyinka haray la kulmaan, waa in dowlad-goboleedyada ay si taxaddar iyo feejignaan leh u hirgeliyaan geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka. Sidaas awgeed, waa in ay si wanaagsan u raacaan hannaanka iyo habraacyada saxda ah ee ku qeexan qaab-dhismeedka Wadajir iyo shuruucda dowladaha hoose. Intaas waxaa dheer, waa in waqti ku filan loo qoondeeyaa marxalad kasta oo dhismaha goleyaasha deegaanka ah.
2. In la dhiso tayada xubnaha goleyaasha deegaanka iyo maayarrada: Sida xogta lasoo uruuriyey muujineyso, xubnaha goleyaasha deegaanka iyo maayarrada ayay labaduba liidataa waxqabadkii looga baahnaa si ay ula wareegaan mas'uuliyadda loo idmaday, iyagoo leh khibrad yar ama aan wax khibrad ah u laheyn shaqada golaha deegaanka. Waxaa dhibaatada sii kordhiyay in xildhibaanada golaha deegaanka iyo maayarrada ay aad ugu yareyd tababarrada lagu dhisayo aqoontooda. Si looga shaqeeyo helidda goleyaal deegaan oo shaqeeya, Wasiirrada Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada waxa ay mudnaanta siin karaan bixinta tababbarro lagu dhisayo aqoonta xubnaha goleyaasha deegaanka iyo maayarrada, iyadoo lala kaashanayo ururrada taageera dowladaha hoose. Waa in tababarrada noocaan ah diiradda la saaraa, sidoo kalena lagu saleeyaa baahiyaha dadka ka faa'iidayo ay qabaan iyadoo aan mashruuc laga dhigeyn. Waa in tababarrada la qabanayo ay dhisaan awoodda iyo fahamka xubnaha goleyaasha deegaanka iyo maayarrada ee arrimaha sida maamulka, hannaanka sharciyada ee heer degmo, qabashada kalfadhiyada golaha, hoggaaminta iyo maamulka, isla xisaabtanka, diyaarinta miisaaniyadda, iyo xallinta khilaafaadka. Arrimahan waxay u baahan yihiin dadaal joogto ah – ma ahan tababarro soo booddo noqon kara – si looga jawaabo caqabadaha howlgelinta saraakiisha dowladaha hoose. Si taas loo gaaro, waa in Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada ay dhisaan machadyo dowladaha hoose leeyihiin oo leh agab ku filan si ay xil isaga saaraan sidii ay marwalba u qiimeyn lahaayeen baahiyaha tababar ee dowladaha hoose ka jira kadibna ay u diyaariyaan tababaro ka jawaabaya baahiyahaas.
3. Dib-u-heshiisiin bulsho oo dhab ah: Beelaha/jufooyinka ku nool dowlad-goboleedyada waxa ay soo mareen tobaneeyo sano oo ay colaado rabshado wata socdeen welina si aan joogto ahayn usoo noqnoqda. Colaadaha noocaan oo kale ah ayaa saameeyay xiriirka

ka dhexeeya beelaha haddana dadaallo dhab ah oo lagu xalliyo dhibaatooyinkii ka dhashay khilaafyadan weli lama sameyn. Iyadoo colaadahan ay saameyn ku yeesheen heer walba ee maamul, haddana dowladaha hoose ayaa si gaar ah ugu nugul saameynta colaadaha. Haddaba, waa in Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada oo kaashanaysa Wasaaradda Arrimaha Gudaha dowladda federaalka ay billaabaan dadaallo dib-u-heshiisiin bulsho oo dhab ah, dhex-dhexaad ah, loona dhan yahay, taasoo fursad siinaysa, islamarkaana la isugu keenayo beelaha ay colaaddu dhex-martay si ay si cad uga doodaan tabashooyinkooda, islamarkaana heshiis uga gaaraan. Xallinta colaadaha waxay faa'ido u yeelan doontaa dhammaan daneeyayaasha, oo ay ku jiraan, beelaha, dowlad-goboleedyada, iyo dowladaha hoose. Gaar ahaan, marka ay beeluhu xalliyaan khilaafyada dhexdooda ka jira, waxaa si habsami leh loo hirgelin karaa dhismaha goleyaasha deegaanka, sidoo kale shaqada goleyaasha deegaanka waxay noqon doonaan kuwo waxtar leh maadaama ay bulshadu arki karto faa'iidada dowladda hoose. Sikastaba ha ahaatee, fulinta dib-u-heshiisiin dhab ah waxay u baahan tahay dowlad-goboleedyo taabbogal ah oo leh hoggaan karti, aragti iyo sharciyad leh, loona arko in uu dhexdhexaad u yahay beelaha/jufooyinka, awoodna u leh in uu dhaqaale ku bixiyo howshaas. Intaa waxaa dheer, waxay u baahan tahay hay'ado amni oo loo dhan yahay oo heer dowlad-goboleed ah oo fulin kara dadaallada dib-u-heshiisiinta sidoo kalena xakameyn karta colaadaha beelaha.

4. Mudnaan-siinta doorashooyinka goleyaasha deegaanka: Dadka deegaanka ee ka qeybqaatay daraasaddan waxay muujiyeen qanaaco la'aan ku wajahan sida ay dowlad-goboleedyadu u maamuleen doorashooyinka dadban ee goleyaasha deegaanka oo ay ka soo bexeen natiijooyin sababay shaqeyn la'aanta goleyaasha deegaanka. Waxay muujiyeen dalab cad oo ah in doorasho degmo oo toos ah ay tahay xalka keliya ee lagu dhisi karo maamullo hoose oo sharci ah, shaqeeya, oo lala xisaabtami karo. Hadda wixii ka dambeeya, waa in dowlad-goboleedyadu ay dejiyaan qorsheyaasha iyo kaabayaasha lagama maarmaanka u ah qabanqaabada doorashooyin toos ah oo ka dhaca degmooyinka ay suuragalka tahay in laga qabto, iyadoo la tixgelinayo caqabadaha badan ee ay dowlad-goboleedyadu waajahayaan. Doorashada noocaan ah ayaa lagu tijaabin karaa degmooyinka Galmudug ee goleyaasha deegaanka loo dhisi rabo ee uu amnigoodu wanaagsan yahay. Tani waxay ku xirnaan doontaa rabitaanka siyaasadeed iyo ka go'naanta hoggaanka sare ee dowlad-goboleedyada, gaar ahaan madaxweynayaasha. Dowlad-goboleedyada waxay u baahan doonaan inay diyaariyaan kaabayaasha muhiimka u ah doorashada, sida dhismaha guddiga maamulaya doorashooyinka iyo diiwaangelinta ururrada siyaasadda si ay ugu tartamaan xubnaha goleyaasha deegaanka. Arrintan waxa ay sidoo kale u baahan tahay helitaanka taageero farsamo iyo dhaqaale. Waxaa taas ka sii muhiimsan, in arrintan lala xiriiriyo heshiiskii doorasho ee Golaha Wadatashiga Qaranka (GWQ) gaareen May 2023-kii, kaasoo soo jeediyay qorshe lagu qabanaayo doorashooyinka Soomaaliya iyo sidoo kale doorasho mideysan oo goleyaasha deegaanka ah.

5. Hubinta in dadka saxda ah loo doorto goleyaasha deegaanka: inta laga gaarayo shuruudaha doorasho goleyaal deegaan oo toos loosoo doortay, waa in Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada ay ku dadaalaan hubinta in dadka la soo xulayo ay awood u leeyihiin qabashada howlaha goleyaasha deegaanka – ha noqdo gole

deegaan cusub oo la sameynayo ama mid la beddelayo marka uu muddo-xileedkiisu dhamaado. Wada-shaqeynta u dhexeysa xubnaha golaha deegaanka iyo maayarrada waxaa ay muhiim u tahay waxqabadka goleyaasha deegaanka iyo sidoo kale amaanada iyo xirfadda dadka ay odayaasha beeluhu u soo jeedinayaan in ay xubno ka noqdaan golaha. Waa in musharraxiinta ay ahaadaan kuwo deggan degmooyinkaas, leh ilo dhaqaale, iyo in uu heysto ugu yaraan shahaaddada waxbarashada dugsiga sare.

6. In dhaqaale gudaha ah lagu dhiso goleyaasha deegaanka: Dowlad-goboleedyadu waxa ay ku tiirsanaayeen taageero uga imaaneysay hay'adaha aan dowliga ahayn ee caalamiga ah kuwaasoo fududeynayay hirgelinta dhismaha goleyaasha deegaanka, geeddi-socodka ayaa sidoo kale hakad galayay marka la waayo teegeeradaas. Tani waxay bulshada iyo dadka kale ee ay khuseyso ku abuurtay fikrado khaldan oo ah in ay jiraan dano dhaqaale oo laga helayo geeddi-socodka. Waa in dowlad-goboleeyadu ay dhaqaale gudaha ah u qorsheeyaan dhismaha goleyaasha deegaanka si loo yareeyo ku-tiirsanaanshaha maalgelinta dibadda. Si taas loo gaaro, dowlad-goboleedyadu waxay lacag ku dari karaan miisaaniyaddooda oo lagu daboolo kharashyada yar yar ee loo isticmaalayo geeddi-socodka. Waxa ay, sidoo kale, dhaqaale ka uruurin karaan beelaha deegaanka. Tani waxay gacan ka geysan kartaa kor-u-qaadista dareenka lahaanshaha goleyaasha deegaanka ee beelaha iyo kordhinta taageeradooda mustaqbalka ee dowladaha hoose iyadoo loo marayo bixinta canshuuraha.

7. Dib-u-eegista sharciga dowladaha hoose & in siyaasado la dejiyo: Waa in Wasaaradaha Arimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada ay dib-u-eegis ku sameeyaan sharciyadooda dowladaha hoose si ay u buuxiyaan dulduleellada ka jira iyo kuwa soo baxay kadib hirgelintii nidaamka dhismaha goleyaasha deegaanka. Waa in dadaallada dib-u-eegista mustaqbalka uu si cad u qeexo mas'uuliyadda maaliyadeed iyo midda adeeg bixin ee dowladaha hoose; iyo in uu kala xadeeyo awoodaha fulinta ee dowladda hoose ee maayarka, maayar ku xigeenka, iyo xog-hayaha oo dhinac ah, iyo xubnaha golaha deegaanka oo dhanaca kale ah. In sidaas la sameeyo waxa ay meesha ka saareysaa is-qab-qabsiga labada dhinac ee ku saabsan xilalka iyo masuuliyadaha, iyadoo mid walba uu ogaanayo xadkiisa, ayna wada shaqeyn karaan. Sidoo kale, waa in Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ay goleyaasha deegaanka ka caawiyaan diyaarinta siyaasadaha iyo habraacyada kuwaasoo fure u ah shaqeynta dowladaha hoose si waafaqsan qaab-dhismeedka sharci ee dowlad-goboleedyada.

8. Yareynta faragelinta dhismaha goleyaasha deegaanka & dowladaha hoose: Si loo helo dowlado hoose oo shaqeeya, waa in hoggaanka dowlad-goboleedyadu ay faragelinta ka daayaan hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka iyagoo doonaya in ay ku helaan dhibco siyaasadeed oo u wanaagsan; tusaale ahaan in ay ka shaqeeyaan doorashada maayarro iyaga daacad u ah. Qaabkan daneysiga ah ee lagu eedeeyay hoggaamiyeyaasha dowlad-goboleedyada ayaa xagal-daacisay xaaladda ka dambeysa dhismaha goleyaasha deegaanka. Waa in ay diiradda saaraan hannaan nadiif ah oo waafaqsan qaab-dhismeedka sharci aqbalaadna ka helaya bulshada deegaanka. Hoggaaminta nidaam aqbalaad leh waxa ay faa'iido dhaxal-gal ah u noqoneysaa madaxda iyo bulshooyinka deegaanka kuwaasoo uga faa'iideysan kara xulashada mas'uuliyiin u adeega danaha bulshada. Taa caksigeeda, dhaxalka iyo sumcadda madaxda ku milmay geeddi-

socodka waxaa xumeynaya ficilkooda. Intaa waxaa dheer, waa in madaxda dowlad-goboleedyada aanay saameyn ku yeelan maayarrada si ay u fuliyaan dalabkooda iyagoo xagal-daacinaya danaha dadka deegaanka.

9. In la kobciyo lana taageero dowladaha hoose: Dhaliilaha dowlad-goboleedyada iyo Wasaaradahooda Arrimaha Gudaha ayaa ah in Wasaaradaha lagu dhaleeceeyo in ay dhiseen goleyaal deegaan kadibna ka tagaan. Dowlad-goboleedyada ayaa sii haysta awoodaha maaliyadeed iyo adeeg bixinta dowladaha hoose ee ay dhiseen. Waxaa kasii dhib badan, dowlad-goboleedyada uma qoondeeyaan lacagaha canshuurta ay kasoo uruuriyaan ilaha dakhli ee dhulka ay maamulaan, tusaale; deeqaha, ama dakhliga laga helo shatiga iyo kheyraadka dabiiciga ah oo ay dowladda federaalku siiso. Si looga jawaabo baahiyaha adag ee dowladaha hoose waa in dowlad-goboleedyada ay daadejiyaan awoodaha oo ay ka caawiyaan dowladaha hoose uruurinta dakhligooda. Sidoo kale, waa in dowlad-goboleedyadu ay qoondeeyaan qeyb kamid ah dakhliga maamulka iyo lacagaha kale ee ay dowladda federaalka ka helaan una wareejiyaan dowladahooda hoose.

10. Dammaanad-qaadidda qoondada haweenka ee goleyaasha deegaanka: Inkastoo haweenka Soomaaliyeed ay qeyb muhiim ah ka yihiin bulshada dhexdeeda, haddana si aad ah ayay ugu yar yihiin goleyaasha deegaana ee hadda jira. Sidaas darteed, waa in dowlad-goboleedyadu ay xaqiijiyaan damaanad-qaadidda ugu yaraan 30% qoondada metelaadda dumarka ee goleyaasha deegaanka iyo in ay goleyaasha deegaanka hoggaamiyaan u ololeynta in metelaad caddaalad ah ay haweenka ka helaan dhammaan xilalka la magacaabo. In haween karti badan ay kamid noqdaan goleyaasha deegaanka wax ay waxtar u leedahay dowladaha hoose si ay u xoojiyaan taageerada dadka deegaanka ee maamulkooda.

11. Bilaabidda wacyigelin bulsho dhab ah ee goleyaasha deegaanka iyo dowladaha hoose: Si loo saxo fikradaha qalloocan ee bulshadu ka aaminsan tahay goleyaasha deegaanka iyo dowladaha hoose, waa in Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedyada ay ku dadaalaan sidii ay u billaabi lahaayeen dadaallo dhab ah oo joogto ah oo bulshada loogu baraarujinayo muhiimadda iyo waxtarka ay leeyihiin goleyaasha deegaanka ama dowladaha hoose inta lagu jiro hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka iyo kadib. Inta lagu jiro ololaha wacyigelinta, waa in Wasaaradaha Arrimaha Guduhu ay diyaariyaan fariimo soo jiidasho leh oo ku wajahan bulshada iyagoo isticmaalaya dhammaan dariiqyada la heli karo, oo ay diintu kamid tahay, si ay u sharraxaan muhiimadda ay leeyihiin dowladaha hoose. Si fariinta loo gaarsiiyo dadka la doonayo, Wasaaradaha Arrimaha Gudaha waa in ay adeegsadaan marinnada sida minbarrada masjidyada, suuqyada ganacsiga, iskuullada, warbaahinta gudaha, shaqsiyaadka maxalliga ah ee baraha bulshada saameynta ku leh, boorarka, abwaannada, odayaasha dhaqanka, ururrada dhalinyarada, haweenka, iyo ururrada bulshada rayidka ah.

# 11.0 Tixraac

FGS interior & Galmudug Interior Ministries. (2019). Dhusamareb District Council Formation: A joint Assessment Report.

United Nations Security Council. (2019). Report of the Secretary-General on Somalia.

Somali Stability Fund. (2020). District Council Formation : Lesson Learned Study.

Reliefweb. (2008, August 4). Retrieved May 2023, from Somalia: Grassroots democracy strengthens local government in Puntland: https://reliefweb.int/report/somalia/somalia-grassroots-democracy-strengthens-local-government-puntland

Bareedo Platform. (2019, November 27). Counting Women's Participation In Puntland Municipal Elections. Retrieved May 2023, from https://bareedo.org/counting-womens-representation-in-puntland-municipal-elections/

FCA. (2021). Promoting inclusive local governance in Somalia: Looking Back-Looking Ahead.

Yusuf, F. I. (2023). Decentralizing taxation and public services to local governments in Somalia: Findings from Puntland, Galmudug, and Benadir.

## Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

Somali Public Agenda waxa ay aaminsan tahay in dhammaan dadka Soomaaliyeed ay mudan yihiin adeegyo bulsho oo wanaagsan oo ay kamid yihiin helitaan waxbarasho la awoodi karo, daryeel caafimaad, guri, amni iyo caddaalad ee uu bixiyo maamul hufan oo lala xisaabtamo

## Howlaha Aan Qabanno

**Cilmibaaris:** Somali Public Agenda waxa ay ka qeyb qaadataa sare-u-qaadista fahamka iyo hagaajinta maamulka dowliga ah ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cilmibaaris iyo falanqeyn lagu sameeyo arrimo kala duwan oo saameeya siyaasadda dowladda iyo bixinta adeegyada bulshada. SPA waxay si joogto ah u daabacdaa daraasado iyo faallooyin (oo intooda badan ku qoran afafka Soomaaliga iyo Ingiriiska) falanqeeya maamul-daadejinta iyo dowladaha hoose; dimuqraadiyeynta iyo doorashooyinka; maamulka maaliyadda; amniga, cadaaladda, iyo ku dhaqanka sharciga; qorsheynta magaalooyinka iyo maamulka dhulka; shaqada; iyo, nidaamka waxbarashada iyo adeegyada caafimaadka. Qoraalladani waxay inta badan macluumaad iyo falanqeyn ka siiyaan muwaadiniinta, siyaasad-dejiyeyaasha, aqoonyahannada iyo beesha caalamka arrimaha dowlad-dhisidda iyo adeegyada bulshada ee Soomaaliya.

**Wadahadal:** Public Agenda Forum waa madal iyo goob lagu falanqeeyo arrimaha dowlad-shisidda iyo adeegyada bulshada ee Soomaaliya. Madashu (oo ay ku jiraan kulamo bille ah oo loo yaqaanno Gaxwo & Gorfeyn) waxaa loogu talagalay in lagu gorfeeyo arrimaha muhiimka ah ee mudnaanta u leh bulshada. Qeybaha kala duwan ee bulshada oo ay ku jiraan cilmibaarayaal, siyaasad-dejiyayaal, iyo xirfadlayaal ayaa lagu martiqaadaa inay si siman u lafaguraan arrimaha laga doodayo. Public Agenda Forum waxay qabanqaabisaa wadahadallo lala yeesho siyaasiyiinta iyo dadweynaha waxayna abaabushaa aqoon-is-weydaarsiyo, siminaaro, iyo bandhigyo buugaag iyo daraasado. Inta badan qodobbada kasoo baxa doodaha Madasha waxay macluumaad ku biiriyaan faallooyinka Somali Public Agenda.

**Naqshadeynta Adeegyada Bulshada:** Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka iyo talooyinka daraasadaheena, waxaan innagoo kaashaneyna hay'adaha ay khuseyso naqshadeynaa siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda innagoo adeegsaneyna SPA Policy Lab. Innaga oo kaashaneyna siyaasad-dejiyeyaasha, shaqaalaha rayidka, iyo bulshada, waxaan u naqshadeynaa adeegyada dadweynaha si aqoon ku dhisan. Kahor inta aanay dowladdu maalgelin siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda la qorsheeyay, waxaan ka caawinnaa in lagu tijaabiyo adeegga la naqshadeeyay heer yar si loo fahmo waxtarka adeegyada la naqshadeeyay.

**Tababar:** Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka cilmibaaristeena iyo naqshadeynta aan sameyno, Xarunta Waxbarashada iyo Horumarinta ee Somali Public Agenda waxay bixisaa koorsooyin tababar gaaban si gacan looga geysto dhisidda kaadir maamul oo fulin kara siyaasadaha iyo barnaamijyada. Xarunta Waxbarashada iyo Horumarinta ujeeddadeedu waa in lagu xiro shaqaalaha rayidka ah, siyaasiyiinta, iyo shaqaalaha hay'adaha aan macaash doonka ahayn bulshada iyo in la siiyo maamullada xirfadaha farsamo ee lagama maarmaanka u ah diyaarinta iyo hirgelinta xalalka caqabadaha adeegga dadweynaha ka jira. Intaa waxaa dheer, xaruntu waxay siisaa tababaro xirfadlayaal Soomaali ah gaar ahaan kuwa xiiseynaya inay ku biiraan dowladda iyo sidoo kale xirfadlayaasha ku howlan adeegyada bulshada iyo hay'adaha aan macaash doonka ahayn.

Somali Public Agenda
Mogadishu
Somalia
Tel: +252(0)85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
Website: <https://www.somalipublicagenda.org>